Sanadkii 2aad Tirsigii 14aad

# HALGAN

Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed

## • SOOMAALIDA GALBEED – QIIMO LA'ANTA HESHIISYADII XABASHIDA IYO GUMEYSATADA YURUB

## Kaydinta taariikhda soomaaliyeed

## Diyaarinta kaadirka

## Lama huraannimada burburka midabtakoorka

U Halgan
Waxbarasho
Si Waxbarashadu
Halgankaaga
U Kordhiso

# HALGAN

waxaa soo saara
GOLAHA DHEXE EE
XISBIGA H. K. S. BISHIIBA HAL MAR

GUDDIGA QORAALKA

MAXAMED AADEN SHEEKH /Guddoomiye

ABUUKAR MAXAMED XUSEEN (Ikar)/ Xoghaye

XUBNAHA GUDDIGA QORAALKA

Xuseen Maxamed Aadan

Saciid Cabdisalaam

Rashiid Shiikh Cabdulaahi

Yuusuf Suleymaan

QIIMAHA

Soomaaliya
Koobigiiba 2/= Shilin
Sanadkiiba 40=/ shilin oo kharajka Boostada ku jiro

**Dumida Carbeed iyo Afrikada Bari**
40/= shilin sanadkii oo kharajka boostadu ku jiro.

**Koonfur, bartamaha iyo Galbeed Afrika**
$17.00 sanadkiiba Kharajka boostadu ku jiro.

**Aasiya**
$20.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku jiro

**Yurub**
$25.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku jiro

**Ameerika (Waqooyi iyo koonfur)**
$30.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku

# TUSMO


| | Bogga |
|---|---|
| **I. DAYMADA** | |
| — Xaaladda Geeska Afrika | 2 |
| — Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka | 5 |
| **II. ARRIMAHA SIYAASADDA, DHAQAALAHA IYO BULSHADA** | |
| — Qiimo La'aanta Heshiisyadii Xabashida iyo Gumeysatada Yurub - Y. C. Rooble | 6 |
| — Dhalashadii Iskaashatooyinka iyo Korrinkooda. Yaasiin Geelle | 9 |
| **III. NOLOSHA XISBIGA** | |
| — Xoghayaha Guud oo Ceel Jaalle Tababar ka furay | 12 |
| — Shirar lagu falanqeeyay Arrimaha Geeska. | 13 |
| — Hawlaha Guddiyada Xisbiga: Ceel - Waaq iyo luuq Ururrada Bulshada | 14 |
| — Dhaqdhaqaaqa Dhallinta Shaqaysa | 15 |
| — Ururka Shaqaalaha Gobolka Benaadir | 16 |
| — X. G. U. SH. S | 17 |
| — Aasaasidda Ururka Dhallinta Mosaanbiik | 18 |
| **IV. ARRIMAHA DUNIDA** | |
| — Xaaladda Soomaali Galbeed C.M. Cabuud | 19 |
| — Lama Huraannimada Burburka Midabtakoorka - Boobe | 21 |
| **V. WARBIXINTA BISHA** | |
| — Tegiddii Xoghayaha Guud ee Madagaskar | 23 |
| — Qalinjebintii Iaad ee Kulliyadda Daawada | 23 |
| — 34 Guuradii Ciidanka Booliska | 24 |
| — Bayaankii J.D.S. ee Bariga Dhexe | 25 |
| — Booqashadii Kulmiye | 25 |
| — Magacaabid Wasiir Cusub | 26 |
| — Steve Biko | 26 |
| — Warfidiyeenkii Shiinaha | 27 |
| — Booqashadii Mudanayaasha Maraykanka | 28 |
| — Wafdigii Jabhadda Xoreynta Ereteriya | 29 |
| — Wafdi Soomaaliyeed oo booqday Dalka Maraykanka | 29 |
| **VI. ARAGTIDA CILMIGA AH** | |
| — Diyaarinta Kaadarka - Y. Sh. Muuse | 31 |
| **VII. HIDDAHA IYO DHAQANKA** | |
| — Kaydinta Taariikhda Soomaalida - Khooli | 33 |
| — Fanka Muuqaalka - Bufalo | 34 |
| **VIII. BUUGAAGTA IYO QORAALLADA** | |
| — Khudbaddii Xoghayaha Guud ee Ardayda Qalinjebisay. | 37 |
| — Bibliyografiyada Soomaaliya - C. Y. Ducaale | 39 |



# HALGAN

oo ku soo baxa afafka Soomaaliga
Carabiga iyo Ingiriiska.

S.B. 1204
Telefoon Lr. 720-51,74
Qolka Lr. 112
Guriga Ummadda
Muqdisho, JDS

1 CODKA RASMIGA AH EE GOLAHA DHEXE EE X.H.K.S:
Bishiiba mar Sannadkii 2aad Tirsigii 14aad Diisambar 1977, qiimaha waa 2 Sh.

Daymada Wargeyska

# XAALADDA GEESKA AFRIKA WAY SII KALA CADDAANEYSAA

Midowga Sofiyeeti wuxuu u ballanqaaday Taliska Mingistu in asaga waqtigu la jiro, inuu ka samatabixidoono dhibaatooyinka ka taagan gudaha Dalka Xabashida, kana guleysandoono Gobannimadoonka halganka ugu jira xorriyadooda. Ballankaasi, waa hubaal, qiimo ayuu ku joogaa, qiimahaasina waa:

1. In la baabi'iyo xoogagga horusocodka ah ee Itoobiya gudaheeda Mingistu ka horjeeda,

2. In la tir-tiro dadka reer Eriteriya, oo 16 Sano madaxbanaanidooda u soo dagaallamayey;

3. In Shucuubta Soomaali Galbeed iyo Abbo ayagana la gumaado;

4. In Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya, oo dembigeedu yahay iney dadyowgaas walaalahooda ah gacan siiso, garabkeeda laga baxo, kaddibna la siiyo darsi ayan ka soo waaqsan.

Qiimahaas oo dhami wuxuu isugu soo ururayaa in dadweynaha adduunuku dareemo in haddii danta iyo go'aanka Midowga Sofiyeeti meel galaan uusan u aaba-yeeleyn xaq, caddaalad iyo mabda'a midnaba, iyo in, dhinaca kale, dadweynihii Xabashida dilka iyo dibindaabyada joogtada ah ee lagu hayo loogu sawiro iney yihiin habka ugu fayoow ee dhabta ee lagu dhiso bulsho hantiwadaag ah, taas oo ka sii dheereyneysa, siina necbeysiineysa wax allaale wixii hantiwadaag ku abtirsada. Hindiseyaal mar mar lagu hadaaqo oy ka mid yihiin: Dadweynuhu wax ma ogee waa in la hagaa, waa in la qasbaa, waa in la gubaa si uu u baraarugo, illeyn kooleyba annagaa dantooda garaneynee, ma aha mid ninna ka musaabaxaysa dembiga weyn ee taariikhiga ah ee laga gelayo ummadda xabashida, ama xoogagga gobannimadoonka oo aan ayaga sinaba looi tixgelin.

Xaggaa kale dawladihii reer Galbeed waxay dhowr kol ku dhawaaqeen in ay doonayaan iney dhex-dhexaad ka ahaadaan dhibaatooyinka Geeska Afrika ka taagan. welibana intey ka socdaan dagaallada Gobannimadoonku. Taas macneheeda waxaa loo qaadan karaa:

1. Halkaas Midowga Soofiyeeti iyo intey is-bahaystaan baa dhooqo lugaha kula jiree ayagu ha ku curyaameen.

2. Saaxiibtinnimadii Soomaaliya iyo Midowga Soofiyeeti waa gurtay, xabashina is-ma-hayn doonaan, maxaa wacay Mingistu iyo koox yar oo aan sal dadweynaha ku lahayn baa Midowga Soofiyeeti

ku tiirsanyahay, haddii kuwaasi meesha ka baxaanna meel dambe oo uu u ciirsanayo ma jirto. Maxaa marka na jirrabaya ama na dedejinaya?

Laakiin waxaa is-weydiis leh: Midowga Soofiyeeti miyuu taas moogyahay? Jawaabtu waa maya! Waxaana u daliil ah saansaanka siyaasadda iyo istratejiyada uu hirgelinayo, oo saddex qaybood loo kala qaadi karo:

B) Inuu Taliska Mingistu cagaha u dejiyo, qof ahaantiisa iyo haybaddiisana bad-baadiyo, taasoo lagu gaarayo;

i) Ayadoo Imbeeradii «Itoobiya» iyo waxay gumeysan jirtey sandulle laga isugu hayo. Waxaana marag ka ah Midowga Soofiyeeti oo laftiisu qirey inaan 15 Malyuun oo dadkii waagii hore ay gumeysan jirtey ayan maanta gacanta ugu jirin (akhri Soviet News, 22 Nofember 1977. bogga 408) ka sokow 4 malyuun oo eriteriyan ah. Haddaba haddii 19 malyuun oo dadkii imberadii «Itoobiya» ay gumeysan jirtey maanta ka xor yihiin kulligeedna lagu sheegaa 24-27 malyuun in xoog la isugu soo celiyo yaa loogu daneynayaa? Waxa keliya oo loogu danaynayaa waa taagidda taliska Mingistu, qiimo kasta oy ku kacdo.

ii) Ayadoo awood qalab iyo ciidanba la siiyo taliska Addis-baba si uu guul uga soo hooyo jabhadaha Gobannimadoonka, kol ay mid ku tahay, Dawladdii taageertana uu ugu cudud sheegto;

iii) Ayadoo marin badeed loo sugo (ku dhinaca eriteriya, ama Jabuuti ama xataa Xeebaha J.D.S.)

J. In Taliska Mingistu lagula taliyo inuu soo jeediyo dhowr qodob oo ku magacaaban «Arrimaha qowmiyaadka» oo uu gobollo imbeeradii hore ka mid ah ugu oggolaanayo wax uu ku magacaabo «is-xukun gudaha ah», hase yeeshee aan gumeysigii iyo xukunkii lagu hayey dadka gobolladaas deggan wax ka beddelayn, cadna uga oggoleyn aayahooda dambe, asagase u anfaceysa inuu adduunweynaha u muujiyo inuu tixgelinayo dhibaatooyinka haysta «Qowmiyaadka» Itoobiya ku dhex nool. Haddii habka arrintaa uu u soo jeediyey miro dhali waayana, xoog lugula muquuniyo qabsashadooda, ayagoo adduunka loogu muujinayo macangagiin gar-ma-qaatayaal ah;

X. In la dedejiyo gaba-gabada dagaalka ay isaga soo horjeedaan ciidammada Xabashida iyo Gobannimadoonka Soomaali Galbeed inta aan adduunka kale u dhug yeelan culayska iyo ciribta arrimaha meesha ka socda.

Kh. Inuu isu diyaariyo siduu ku xalliyi lahaa xaaladda Itoobiya «Xayle Mingistu» ka dib. Maxaa wacay waa caddahay inuusan Mingistu weji uu hantiwadaag ku dhiso ama Ruush ku xajiyo uusan

bilaabeen dalkaas ku yeelan-doonin. Arrintaasna tabaabusheheedii waa la gudagalay, Midowga Soofiyeeti iyo intey is-bahaystaanbana waxay hadda bilaabeen kobcinta xubno ciidammada ka mid ah, qaarkoodna hadda DERGA lugu daray. Dhabbaa Midowga Soofiyeeti u fahansanaa in dhex-dhexaadnimada reer Galbeed ku dhawaaqay ayan cilmi ku fadhiyin, maadaama macneheedu isugu soo ururayey in asaga iyo intey is-bahaystaan ay xabashida ku soo daldalaan waxay hub iyo ciidanba awoodaan, Soomaaliyana wax kasta laga xayiro; saas awgeed buu waqtigaa si fiican uga faa'iidaystay siyaasadihiisana si dhaqso ah uu ku fushadey. Wuxuuse kale oo ogyahay inaan adduunweynuhu ka sii jeedeen arrintaas, hadduuba mar door biday inuu xoog usoo dhexgalo, siduu doonayana u muquuniyo; hay'ado caalami ah iyo dawlado gobolkan ka tirsan ama kuwo is-bidaya in nabad gelyada adduunka xil ka saaran yahay, hadda oy ku baraarugeen khatarta meeshaa ka soo socota, waxaan shaki lahayn ineyan gacmaha ka laaban doonin.

Maxay kolka Soomaaliya dooneysaa? Marar badan baa Madaxweynaha J.D.S. uu ku dhawaaqay ineyan Soomaaliya jecleyn in dagaallada Gobolkan ka socda la caalamiyeyo, maxaa wacay waa dagaallo ka dhex socda gumeysiga Addis-Ababa iyo Gobannimadoon iska xoreynaya. Haddana, inkasta oo Midowga Soofiyeeti uu bilaabay borbogaan ah caalamiyeynta iska horimaadka Gobolka yaal, Soomaaliya waxay diyaar u tahay, kuna shaqeyneysaa intii karaankeeda ah, in nabad xaq ah laga dhaliyo Geeska Afrika. Sidaana Xoghayaha Guud ee X.H.K.S. baa khudbadiisii u dambeysey, ee bisha Jannaayo 7dii uu ka jeediyey Shirweynihii Ururka Guud ee Iskaashatooyinka, ku caddeeyey, markuu yiri: «Xaqiiqada xallinta dhibaatada Geeska Afrika waxay ku jirtaa, in marka hore ay ka baxaan xoogagga shisheeye ee maslaxddooda ay ku jirto caalamiyeynta dagaalka, ka dibna inay dadka dhibaatadu dhex taal, oo ah Jabhadaha Soomaali Galbeed, Abbo, Eritereeya iyo Taliska Addis-Ababa ay isu yimaadaan, ayna si dhab ah uga wada hadlaan arrimaha dhexdooda yaal. Waxayna Dawladda Soomaaliyeed diyaar u tahay inay si buuxda mas'uuliyaddeeda darisnimo iyo Afrikaannimo uga gudato waanwaantaas ayada ah.»

Iyadoo la ogyahay weerarrada gardarrada ah iyo eedaynta joogtada ah ee Taliska Addis-Ababa uu ku hayo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya taasoo danteedu tahay in uu kula soo galgasho dhibaatooyinka ka haysta dagaallada gobannimadoonka ah ee uu awoodi waayey inuu si nabadgelyo ah oo caddaalad ku dhisan uu u xalliyo, haddana Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay mar kasta diyaar u tahay inay si toos ah ugala xaajooto, ugana qanciso Taliska Addis-Ababa eedeynta aan salka iyo raadka lahayn.

Tolow marka ma laga yaabaa in Midowga Soofiyeeti dib u garwaaqsado dhibaatooyinka aan loo baahnayn oo uu gobolka ka abuuray, kaddibna uu gacan ka geysto dhaqdhaqaaqa goobaya xaqa, oo dadka gobolkani u wada baahan yahay?

# Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed

Markii muddo aan yarayn laga shaqaynayey gogoldhigga iyo isu-duwidda xoogsatada kala firisanayd ee beeraha (iyo kuwa xijiga. xoolaha, kalluunka, ganacsatada yar-yar iwm) ayaa shir-weynihii dhismaha ururkii ay isku bahaysanayeen ka bilowday Magaalo-Madaxda Muqdisho, bishan lixdeedii. Ururkaa hadda dhismay waa jawaabtii ugu dambeeysey ee la siinayay dad badan oo is-weydiin jirey: Maxaa gacan xoog leh loogu qaban waayey beeraleyda iyo danyarta la halmaasha? Su'aashaas dadka is-warsanayey waxaa maan-kooda ka maqnaa habka tacab-soo-saarka waddankeennu u dhisnaa iyo tallaabooyinka is-dabajoogga ah ee kacaankii Oktoobar uu qaaday.

Haddii aannu xagga beeraha soo qaadanno, waddankeenna ma jirin dad dhulgoosi ah oo kelıgood dhulka la beero oo dhami hanti u ahaa. Habka beer tacabka wuxuu u qaybsami jirey 3 cayn.

1. Beero meel dhexaad ah oo u go'naa tacabka muuska, waxay ahaayeen hanti-gaar oo mirahooda dibedda loo dhoofiyo, dadka u shaqeeyaana ahaayeen xoogsato beeraley.

2. Beero meel dhexaad ah, oo ayaguna hanti shakhsi ah u badnaa. laguna beeri jirey meseggo, galley, sisin iwm, oo wadanka gudihiisa lagu quudan jirey. Ayagana waxaa ka shaqeyn jirey xoog-sato - beeraley.

3. Beero yar-yar oo dhowr jibaal middiiba ayan ka badneyn oo dadweynaha beeraleyda ahi iskood u falan jireen, dhaqaalaha waddankana wax badan ka tari jirey, ayagase maadaama lagu cuna-qabateyn jirey, aan wax badan hagaajinta noloshooda ka tari jirin. Ummadaas oo dhami dhulka ay falaysey kama badnayn toban mee-lood marka loo dhigo meel dhulka la beeri karo ee waddanka ku yaal.

Kacaankii 21 Oktoobar wuxuu hor iyo abbaataba bilaabay inuu kuwa dambe u gacan taago, ayada oo wax alle waxay miro soo saarayeen toos qiimo fiican looga gatay, ilaa la gaarey in abuurkii iyo bacrin'iiba gacan lagu siiyo. ilaa Bankiga Horumarinta Qaranku deyn xoog leh u hor-mariyo dammaanad la'aan. Beeraleydaasi waa kuwa wacyigooda siyaasiga ahi aad u sare-kacay, maantana u badan asaasiinta ururka iskaashatooyinka.

Gargaarkaa deg-degga ah ee la siiyey beeraleydaasi aad bay u dareemeen fir-fircoonaantooda baa si fiican looga garanayaa. Taa ka sokow, siyaasadda guud ee kacaanku waxay ku qotontey in la dhiirrigeliyo wax - soo - saarka, xataa labada qaybood ee hore ee beeraleyda.

Sida oo kale xoogsatada xijiga goosata ayaga uunbaa maanta qii-meyn kara gacanta kacaanku ka geystey ka wareejinta lahaanshaha dadkii dhirtaa sheegan jirey habaynta guridda xabagtaa iyo dhoo-finteedaba. Waxaan shaki lahayn, maanta oy xoogaggaas oo dhami is-bahaysteen, oy urur iskaashi isugu yimaadeen, in ay ayaguna baa-hi dambe iska xoreyn doonaan. horumarka dhaqaalaha hantiwadaag-ga ee waddankana kaalinta weyn ee ugu beegan ay ka soo bixi doo-naan, haddii ay weliba sugaan hal-hayskii Xoghayaha Guud, Jaalle Siyaad, u soo jeediyey, kaas oo ahaa: «Baro oo badi tacabka».

## Arrimaha Siyaasadda, Dhaqaalaha iyo Bulshada

# Qiimo La'aanta Heshiisyadii Xabashida iyo Gumaysatada Yurub

Yuusuf Cilmi Rooble

1. Heshiisyadii magangelyo ee **dhexmaray Soomaalida iyo xoogag-gii Yurub** ee gumaysiga ahaa,

Heshiisyadii magangelyo ee dhex maray dadka Soomaaliyeed iyo xoogaggii gumaysiga (Ingiriis, Faransiis iyo Talyaaniga )bilowgii qarnigii 19aad waxay si aan muran ku jirin u muujinayaan in Soomaalidu heshiisyadaa uga gol lahayd in la dhowro sugnaanta dhuleed ee degellada Soomaalidu deggaantahay, lagana ilaaliyo dalballaadhsiga Boqor Menelikh II.

Hordhicii heshiiskii magangelyo ee dhexmaray Ingiriiska iyo qabiilooyinkii Soomaaliyeed wuxuu ahaa:

«Annagoo ah, Ugaasyada ku saxeexan heshiiskan, waxaanu rabnaa inaanu heshiis kala gallo Dawlada Ingiriiska si loo dhowro madaxbannaanidayada».

Heshiis guud oo kaa la xidhiidhay 1886kii, dawladda Ingiriisku waxay ku ballanqaadday inay ilaaliso dadka iyo dalka Soomaaliyeed. Qodobkii ugu horreeyey ee heshiiskaasi wuxuu ahaa:

«1. Dawladda Ingiriisku sida ay rabaan Ugaasyadu, waxay ballan qaadaysaa inay u fidiso iyaga iyo dalkoodaba magangelyada boqorradda haybadda leh».

Heshiisyadii saaxiibtinnimo iyo magangelyo oo ay kala saxeexdeen Faransiiska iyo Ugaasyadii Soomaaliyeed ee Ubukh Maarso 26dii 1885kii waxay la mid ahaayeen kuwii Ingiriiska iyo Soomaalida. Qodobka ugu horreeya ee Heshiiskii Soomaalida iyo Faransiisku wuxuu ahaa:

«1. Heshiis aan duugoobin ayaa dhexmari doona Soomaalida iyo Faransiiska».

«II. Ugaasyada Ciise waxay dalkooda u dhiibayaan Faransiiska si uu uga ilaaliyo dadyowga shisheeye».

Heshiiskii 1889kii dhexmaray Talyaaniga iyo Soomaalida Waqooyi-Bari wuxuu isna adkaynayay sugnaanta dhuleed iyo ka nabadgalka weerar shisheeye, kuwaasoo udubdhexaad u ahaa heshiisyadii ay kala saxeexdeen Soomaalida iyo xoogaggii kale ee Yurub.

Sii - qaadka saddexaad wuxuu ahaa:

«Dhulkayagii iyo wixii aanu adduun lahaynba, laga bilaabo Raas Awad ilaa Raas El - Keyle (waadiga Nugaal ayaa ugu fogaa) waxaanu la magangelaynaa Dawladda Talyaaniga»

Heshiisyadii magangelyo ee Dawladda Ingiriisku la gashay Ugaasyada Afrika qarnigii 19aad iyo intii ka danbaysayba waxa ugu hufnaa kii Qunsul Hewit, wakiilkii Ingiriiska ee Afrikada Galbeed.

Warqad Qusulkaasu u qoray ninkii xukumayay OPOBO 1884kii wuku yidhi:

«Boqoraddu ma doonayso inay dalkiinna iyo sayladibiinna qaadato, isla markaana ma rabto in dal kale qaato, waxay ballanqaadaysaa Boqoraddu inay idinku dhowrto awooddeeda, taasoo dalkiinna dhaxalsiin doonta in dawladdiinnu xukunto».

**2. Xaaladda Sharciyeed ee maxmiyadaha.**

Xeer yaqaanadu way ku kala qaybsamaan sifaynta maxamiyadaha marka laga hadlayo qaynuunka caalamiga ah. Qaarkood waxay qabaan madaxbannaani la'aantooda, inaanay maxmiyaduhu ku dhaqnayn qaynuunka caalamiga ah. (Kelsen: the Principles of International law). Intooda badani se waxay qabaan in madaxbannaani la'aantooda ka sokow, ay maxmiyaduhu leeyihiin shakhsiyaddooda caalamiga ah, sidaa darteedna ay waajib tahay in lagu dhaqo qaynuunka caalamiga ah. Ra'iyigaa danbe dadka taageera waxa ka mid ah Gerald Fitzmourice oo arrintaa ka yidhi:

«Ereyga maxmiyad badanaa waxa lagu tilmaamaa Dawlad la ilaaliyo, hase yeeshee beelaha ay ka mid yihiin - kuwa qabiilooyinka Ugaasyadu xukumaan ee aan lahayn sifo dal (Dawladeed) maxmiyad waa la odhan karaa. Inta dal maxmiyad yahay, haba ahaado mid aan madaxbanaanayne, waa shakhsiyad caalamiya waxaannu leeyahay qaranimo».

Isagoo isla arrintaa ka hadlaya Oppenhein wuxuu raaciyey: «sifooyinka maxmiyaduhu waa qaar **geyisiinaya maxmiyaduhu waa qaa** meel ku yeelato qoyska ummadeed isla markaana ahaato shakhsiyad caalamiya oo ku dhaqanta qaynuunka caalamiga ah».

Maxkamadda caalamiga ah ee Gersoorku go'aankeedii loo riyaaqay ee ku saabsanaa «xuquuqda dadka Maraykanka ah ee Morooko, 1952kii wuxuu ahaa:

«Morooko waxay ahayd dawlad inkastoo ay heshiisyo aan dabiici ahayn la gashay Faransiiska oo magac ahaan qaatay xuquuq qarrannimo oo ay lahayd, wakiilna u

noqday».

Georg Schmarzen Berger isagoo arrintaa kore ka hadlaya wuxuu yidhi:-

«Maxmiyad ka yeelku Morocko ka xayuubin maayo shakhsiyadda ay ku leedahay qaynuunka caalamiga ah».

Hadalladaa aan kor ku soo xusnay oo aanu ka soo qaadanay door roonayaasha xeer-yaqaannada caalamiga ahi, waxay muujinayaan in maxmiyaddu leedahay madaxbannaanideeda, xaqna u leedahay in lagu dhaqo qaynuunka caalamiga ah, inkastoo madaxbannaanidii maxmiyadda ay ku takri fali karto mar mar dawladda ilaalinaysaa. J.E.S. Fawect wuxuu arrintaa ka yidhi:

«Astaamaha gundhigga u ah dal Ingiriisku gumaysta, oo kuwa kale oo dhami ka dareeraan, waa inaanu dalkaasi ahayn «dominion» boqorraddu leedahay, hase yeeshee yahay dal shisheeye. Sidaa darteed kursiga boqortooyada Ingiriiska qofka ku fadhiya dalkaa wuu xukumaa, balse ma laha madaxbannaanida dalka maxmiyadda u ah».
(The British Commonwealth in Int. Law P. 118 «1963»)

Waxa laga yaabaa in weedha ugu sugan ee xaaladda maxmiyadeed laga yidhi ay tahay tii Xoghayaha gumeysiga oo Ingiriisku ka yidhi dood lagu falanqaynayay dhulka «Soomaaliyeed» oo ka dhacday guriga barlamanka oo ahayd:

«Haybad leh boqorku ma laha madaxbanaanida dalkaa (Dhulka Soomaaliyeed) balse gu'yaal ayuu lahaa awoodda maamulka iyo sharciga sidii ku xusnayd heshiiskii 1884kii» (Doodihii Baarlamaanka Vol. 304-1934-35 July 4th, Col. 6)

Guud-marka hore ee xaaladda sharciyeed ee maxmiyaduhu wuxuu caddaynayaa in heshiisyadii ay Soomaalidu la gashay Ingiriiska aan marna looga dan lahayn in madaxbannaanida dalka lagu wareejiyo Dawladaha gumeystada ah.

**3. Mucaahadooyinkii dhexmaray gumeysatada Yurub iyo heshiisyadii Itoobiya iyo dawladaha Yurub.**

Ka dib markii ay mucaahadooyin magangelyo la galeen dadka Soomaaliyeed saddexdii gumeysi ee Yurub (Ingiriis, Faransiis iyo Talyaaniguba) markiiba waxay qaybsadeen dalka Soomaaliyeed iyagoo ka taaggan mabaadii'dii ku dheehnayd mucaahadooyinkii magan gelyo ay la galeen dadka Soomaaliyeed. Dawladihii Yurub ee gumeysigu waxay markaa ka dib heshiisyo la galeen Xabashida oo iyaduna gumeysato ahayd iyagoo buriyey heshiisyadii ilaalo ee ay la lageen dadka Soomaaliyeed.

Mucaahadadii 1897kii Xabashida iyo Dawladaha Yurub kala saxeexdeen waxay Xabashida u fududaysay inay si sharci darro ah ku hantido dalweyne Soomaaliyeed oo ay ku darsato harar oo hore ay xoog ugu qabsatay.

Waxaynu isku dayaynaa inaynu si hufan u qeexno astaamaha heshiisyadii iyo waxyaabihii ku kallifay gumaysatada Yurub inay dal ballaadhan oo Soomaaliyeed «uga tagto» gumaysatada Xabashida. Halkan waxaan ku isticmaalayaa ereyga «uga tagto» (abandon) anoo ka door-bidaya ereyga «u goyn» (cede) anoo filaya inaanu ku fiicnayn arrintan.

B) Heshiiskii 1897kii ee Xabashida iyo Faransiiska.

Danaha gumaysatada faransiisku ka lahayd Geeska Afrika laba ayay ahaayeen:

1. Inay ku yeelato Deked Badda Cas si ay u dhowrato danaha ballaadhan ee ay ku leedahay Bariga fog.

11. Inay hantido saaxiibnimada Xabashida oo siin doonta xuquq ganacsi iyo inay danaheeda gaadhsiiso meelaha webiga niilku ka bilaabmo. Sababaha aynu kor ku soo sheegnay ayaa dhaliyay in ergo Faransiis ihi tagto Addis-Ababa 1897kii iyagoo Meneligii II la saxeexday Heshiis. Heshiiskaa gumaysi, sida aynu muujin doono, wuxuu lid ku ahaa:

i. Mabaadiidii ku xusnayd heshiisyadii magangelyo ee Faransiisku la yeeshay Soomaalida.

ii. Heshiiskii 1888kii Ingiriiska iyo Faransiiska dhexmaray ee ku saabsanaa sohdimaha maxmiyadahooda.

Heshiiskaa 1888kii Ingiriiska iyo Faransiiska dhexmaray wuxuu gaadhsiinayay xuduudda gudaha ee maxmiyadda faransiiska Gildesa ilaa Harar, hase yeeshee mucaahadadii Xabashida iyo Faransiisku yeesheen 1897kii waxay xuduuddaa ku sintay Jaleelo.

Arrintaas waxa aad loogu falanqeeyay buug ay Dawladda Soomaaliyeed soo saartay 1974kii oo magaciisu ahaa «Qaybta dhulka Soomaaliyeed ee ku hoos jira gumaysatada Xabashida» halkanna waxan ku soo qaadan doonnaa qaybo aan ka soo dheegtay buuggaa. Arrinta kor ku xusan buuggu wuxuu ka leeyahay:

«1897kii Ingiriisku ergo ayuu u soo diray Menelik si uu u helo guddoonkiisa ku saabsan xadaynta dhulka Soomaaliyeed ee uu ku leeyahay Geeska Afrika. Ergadii markii ay la baayactantay Menelik Maajo 14kii, 1897kii, Ingiriiska iyo Xabashidu Heshiis ayay gaadheen.

Heshiiskaa labada geesoodba waxay ku guddoonsadeen inay jeexaan sohdimahooda. Warqado ay isweydaarsadeen Xabashida Ingiriisku wuxuu ku bixiyey dal Soomaaliyeed oo aanay Xabashidu weligeed yeelan. Mar ergadaa Ingiriiska — Mr. Rodd — uu weydiiyay

Boqor Menelig in dhulkaa Soomaaliyeed ee la siiyay aanu luminayn madaxbannaanidiisa, Menelig wuxuu ku jawaabay «Soomaalida heshiiskan Itoobiya lagu soo raaciyay aad ayaa loo daryeeli doonaa, waxaanay yeelan doonaan Dawlad. Heshiiskaa dhexmaray Xabashida iyo Ingiriisku wuxuu buriyay heshiiskii magangelyo ee hore u dhexmaray Soomaalida iyo Ingiriiska. Marna lama inkiri karo in Ingiriisku dhul Soomaaliyeed Xabashi siiyay. Markii Dawladda Ingiriisku la xaajoonaysay Boqor Meneligga II, si loo gaadho heshiiskii 1897kii, ergada Ingiriiska waxa lagula soo dardaarmay, «waxad awood u leedahay haddii ay lama huraan noqoto, inaad dhul Soomaaliyeed bixiso, sidii ku qeexnayd mucaahadadii Talyaaniga iyo Ingiriiska dhexmartay 1894kii, adoo hubinaya inaan dhul bixintaasi wax yeelan ujeeddooyinkii maxmiyadda loo sameeyay, sida in caddaan loo helo meel wax laga siiyo».

Saddex arrimood ayaa Ingiriiska ku kelliftay inuu dhul Soomaaliyeed Xabashi siiyo.

1. In Menelig Ingiriiska u oggolaado inaan hub Mahdiga Socdaan loo soo marin Itoobiya.

2. Inaan Itoobiya u oggolaan Faransiiska inuu dal ballaadhasado oo Itoobiya intuu dhexmaro, webiga Niilka dal ka qabsado.

3. Inay Itoobiya dhowrto danaha ganacsi ee Ingiriiska ee mar walba sii ballaadhanaya.

Mr. Rennel Rodd, oo madax u ahaa Ergadii Ingiriiska ee Menelig II loo diray, warbixintii uu kaga hadlayay dhulkii Soomaaliyeed ee Xabashida uu ku wareejiyay 1897kii, wuxuu ku qiray in dhulka Soomaaliyeed aanu marna ahayn dhul Xabashiyeed: wuxuu warbixintiisaa ku yidhi: «Haddaan eego sida xadka loo jeexay, Menelig II ayaa booday: hase yeeshee waxaad ku socotaa irridaha Harar; waxaan ku idhi Xabashida ayaa soo socotay, masaaridii annagaa uga danbayney Harar heshiisyana la gallay Soomaalida intaan Xabashidu Harar soo gelin. Boqorku markaa wuxuu guudmaray sohdimihii hore ee Xabashida waxaan weydiiyay sida Soomaalidii qarniyada dhulkan ku uunnayd loogu dari karo Itoobiya

J. Borotokoolkii Ingiriiska iyo Talyaaniga ee 1894 iyo Heshiisyadii Xabashida iyo Talyaaniga ee 1897kii iyo 1908.

Talyaaniga iyo Ingiriiska oo labaduba maxmiyado Soomaaliyeed haystay ayaa 1894kii ku heshiiyay inay kala suntadaan sohdimadooda. Borotokoolkaa ayaa Ingiriisku dhul Soomaaliyeed ku siiyay Talyaaniga, isagoo jebiyay heshiisyadii magangelyo. 1896kii markii Boqor Meneliggii II Adowa Talyaaniga ku jebiyay Talyaanigu wuu u adkaysan waayay dhul ballaadhsigii Xabashida sidaa darteedna waxay ku kalliftay inuu Talyaanigu 1897kii heshiis la yeesho Meneliggii II, kaa soo Talyaanigu ku wareejiyay Xabashida dalweyne Soomaaliyeed. Talyaanigu markaa wuu buriyay heshiisyadii magangelyo ee Soomaalida uu la yeeshay 1889kii.

Maajo, 16dii, 1908kii Talyaaniga iyo Xabashidu waxay guddoonsadeen inay kala xadaystaan dhulkii Soomaaliyeed ee ay haysteen.

Sida foosha xun ee loo kala qaybiyay dhulka iyo dadka Soomaaliyeed waxa si ballaadhan buuggiisa «Daruuraha Dagaalkee dul hoganaya Geeska Afrika», ugu muujiyay J. Farer.

«Guud ahaanba, 1897kii guul ayuu u ahaa Xabashida, dawladihii gumeysatada Yurub ee ay deriska ahaayeenba oggolaaday dal ballaadhsigeedii, waxaanay jeclaadeen inay saaxiibnimo la yeeshaan. Waxa haatan caddaatay in saaxiibnimo la yeelan karo iyadoo la siman yahay. In danbe lagu murmi maayo maxmiyado, sannad cad ayay u ahayd Xabashida, Soomaaliyana mid madow kol haddii aan lagala tashan heshiisyadaa dalkooda lagu wareejiyay».

Mr. John Drysdale — oo aad xogogaal ugu ah taariikhda Soomaaliyeed — wuxuu ku qoray Buuggiisa, «The Somali Dispute»: «Soomaalidu heshiisyadii ay Ingiriiska la gashay 1884kii kuma ay wareejin dalkeeda Ingiriiska, balse waxay codsatay dib u celinta khadawigii Masar heshiisyadaa oo aan wax yeelayn madaxbannaanidooda. Soomaalidu marna ma oggolaan in dal ay leedahay la wareejiyo. Heshiisyadii Soomaalidu ay Ingiriiska la gashay waxay ku codsatay in dhulkooda la nabadgeliyo. Sidaa darteed Soomaalidu waxay aqoonsanayd in mucaahadadii Xabashida iyo Ingiriiska ee 1897kii sida tii Talyaaniga ee 1894kii idilkood ahaayeen burin mucaahadooyinkii 1884-85kii ee Ingiriiska iyo Soomaalida. Mar haddii dalka Soomaaliyeed Xabashida lagu wareejiyayna mucaahadooyinka Xabashida lala galay dar sharciga ka taaggan ayay ahaayeen falka Dawladda Ingiriiskuna mid aan sharci ahayn ayuu ahaa.

Gumeyisga Yurub iyagoo heshiisyo magangeliyo la galay dadka Soomaaliyeed ma wareejin karaan dalka Soomaaliyeed dadka Soomaaliyeed oo aan ogeyn. Dawladda Xabashidu kuma murmi karto sii haysashada dal Soomaaliyeed, iyadoo u cuskanaysa heshiisyo aan qiimo lahayn. Haddaynu derisno dhacdocyinkii taariikheed ee ka horreeyey heshiisyadii 1897kii iyo 1908kii, waxaa inoo muuqanaysa in heshiisyadaa uu ku qasbay gumeysatadii Yurub awood weynaantii millatari ee Boqor Menelik II.

Waxa kale oo aan caad saarnayn in heshiisyadii sohdimeed ee Gumeystada Yurub ay ku dhaceen si sharciga ka taggan oo dafirsan mabda'a aayo ka tashiga ee Ummadaha.

Mar aqalka Baarlamaanka ee hoose (Ingiriiska) lagaga doodayey he-

shiiskii 1945kii Ingiriiska iyo Xabashida dhexmaray, Xoghayihii gumeyisga ee dawladda Ingiriisku wuxuu yidhi:

«Mucaahadadii 1897kii waa mid caalamiya, mucaahadooyinkii kale se maaha caalami . . (Hansard, doodihii Baarlamaanka ee 1945kii)».

Mucaahadooyinkii dawladaha Yurub la galeen dadka Soomaaliyeed waxay ahayeen qaar caalamiya waxaan lagu dhaqayaa qaynuunka caalamiya ah.



# *Dhalashadii iyo Korriinkii iskaashatooyinka*

*Yaasiin* Geelle

Fikrada dhaqdhaqaaqa iskaashatooyinku waxay u soo ifbaxday dunida Qarnigii 19aad waxayna ka soo aroortay maskaxda culumadii Hantiwadaagga dhalanteedka ahayd, Ragaas oo ay ka mid ahaayeen Robert Owen, Henery Saint Simon iyo kuwo kale oo badan. Culumadaasi waxay muddo badan halgan iyo loolan ugu jireen hirelinta fikradahooda iskaashiga ah. Taas oo ay u arkayeen inay xal u tahay dhibaatada, xaqdarada iyo cadaadiska dunida ka jiray, waxayna, ku fakarayeen in ay iskaashiga ku gaaraan hab Hantiwadaag ah, oo ka maran cadaadis iyo dhiigmiirad, laakiin waxaa hubaal ah in ayan ku guulaysan nidaamkaas ay qabeen ayaga oo aan garan tabaha dhaqangelinta Iskaashatooyinka iyo tartanka ugaimaanayey maalqabeenka waqtigaas joogay. Robert Owen oo ku xeel dheeraa dhaqaalaha waxuu ku baahshay fikradaha iyo garashada iskaashiga wadanka Ingriiska markii Sannadku ahaa 1771 - 1858. Asaga oo rabay in uu mujtamaca wadankaas u bedelo hab iskaashi kana dhaadhicinayey xoogsatadahalkaas ku dhaqnayd faa'iidada ugu jirta mabda' iskaashiga ah. K. Marx wuxuu yidhi asaga oo xiganaya dadaalkii culumadaas siiba Robert Owen waxuu ahaa mid lama iloobaan ah abuurayna mirihii iskaashatooyinka. Waxaa ayana door fiican ka waday dhinaca iskaashatoolinka 1760 — 1837 Saint Simon iyo Charles Fourier. Taas oo soo noolaysay taariikhda dhaqdhaqaaqa iskaashatooyinka mar labaad oo ay soo rogaal celiyeen waxaana dhalatay iskaashato nooca cusub (Rochdole) kana dhashay meelaha warshadaha leh ee shaqaaluhu joogo maadaama shaqaaluhu yahay horumoodkii xoogsatada aynu u Horseedaan qaybaha kale dhaqdhaqaaqa ay ku raadinayaan xuquuqdooda mid siyaasadeed iyo tu dhaqaaleba. Iskaashatooyinka noocaasi waxay bilowdeen 1840 waxaana asaasay 28 Qofood ooshaqaale ahaa, iskaashatadaas oo hirgashay 24-10-1844 ujeedadeeda ugu wayna ahayd in ay ka nabadgeliso xubnaheeda ciriirigii iyo kadeedkii xad-dhaafka ee ay kuhayeen maalqabeenku xagga sicirka cuntada iyo waxyaabaha kale ee loo baahanyahay. Mabaadiida saldhigga u ahayd iskaashatadaas waxaa ugu waaweynaa:

1. In la gado badeeco tayo fiican miissan iyo mitir sax ah.

2. In badeecada lagu gado gacansaar (cash) sicirkuna ahaado mid dhexdhexaad ah.

3. Faa'iidada in loo qaybsanayo mugga gadashadiisa (Inta uu ka gato dukaanka iskaashatada ayuu faa'iidadeeda helayaa qofku)

4. Faa'iidada iskaashatadu hesho qaarkeed waa in wax lagu baro xubnaha iskaashatada .

5. Waa in qof kasta xor u yahay coddhiibashada (qofkii hal cod).

Haddaba waxaad aragtaan in iskaashatooyinku heleen qodobo ay ku hirtaan si ay u fahmaan micnaha iyo faa'iidooyinka iskaashigu leeyahay taas oo dhalisay in si deg-deg ah ugu fido dhismaha iskaashatooyinku Yurub. 1913kii waxaa lagu qiyaasay dadka ku jira iskaashatooyinka 3.000.000 oo Xubnood 1914kii waxay gaareen 7.000.000; wadankaas Ingiriiskana waxaa ka furaa in ka badan 1.000 Iskaashato. Arrimahaas oo idil waxay dalalka dunida oo dhan ku baraarujiyeen hirgelinta iyo qiimaha iskaashatooyinku u leeyihiin bulshada.

## ISKAASHATOOYINKA NOOCA CUSUB

Waqtigaas ka dib waxa aad adduunka ugu fiday fikrada iskaashiga. Ayada oo shaqaalaha iyo beeralayduba uga gaashaamanayaan dhiigmiirka.

Haddaba waxay aad u dhabowday una hirgashay dhismaha Iskaashatooyinku markii ay xukunkii la wareegtay xoogsatada aaminsan nidaamka H/Wadaagga ah kuwaas oo kacaankoodii ugu horreeyey ka riday wadankaas midowga Soofiyeeti, markaas oo ummadihii dulmanaa qaarkood heleen hab iskaashi oo leh dhiirigalin xag qalab-dhul farsamo kana maran cadaadis tartan dhaqaale iyo iska horjeed bulsheed taasoo keentay in iskaashatooyinku bataan tiradooda iyo tayadoodaba aanu dhasho iskaashi Caalaminimo waxaana dhashay hay'ad sare ee ka dhaxaysa iskaashatooyinka Adduunka saldhigeeduna yahay LONDON waddanka Ingriiska, haatana

shiiskii 1945kii Ingiriiska iyo Xabashida dhexmaray, Xoghayihii gumeyisga ee dawladda Ingiriisku wuxuu yidhi: «Mucaahadadii 1897kii waa mid caalamiya, mucaahadooyinkii kale se maaha caalami . . . (Hansard, doodihii Baarlamaanka ee 1945-kii)».

Mucaahadooyinkii dawladaha Yurub la galeen dadka Soomaaliyeed waxay ahayeen qaar caalamiya waxaan lagu dhaqayaa qayuunka caalamiya ah.



# Dhalashadii iyo Korriinkii iskaashatooyinka

*Yaasiin* **Geelle**

Fikrada dhaqdhaqaaqa iskaashatooyinku waxay u soo ifbaxday dunida Qarnigii 19aad waxayna ka soo aroortay maskaxda culumadii Hantiwadaagga dhalanteedka ahayd, Ragaas oo ay ka mid ahaayeen Robert Owen, Henery Saint Simon iyo kuwo kale oo badan. Culumadaasi waxay muddo badan halgan iyo loolan ugu jireen hirelinta fikradahooda iskaashiga ah. Taas oo ay u arkayeen inay xal u tahay dhibaatada, xaqdarada iyo cadaadiska dunida ka jiray, waxayna, ku fakarayeen in ay iskaashiga ku gaaraan hab Hantiwadaag ah, oo ka maran cadaadis iyo dhiigmiirad, laakiin waxaa hubaal ah in ayan ku guulaysan nidaamkaas ay qabeen ayaga oo aan garan tabaha dhaqangelinta Iskaashatooyinka iyo tartanka uga imaanayey maalqabeenka waqtigaas joogay. Robert Owen oo ku xeel dheeraa dhaqaalaha waxuu ku baahshay fikradaha iyo garashada iskaashiga wadanka Ingriiska markii Sannadku ahaa 1771 - 1858. Asaga oo rabay in uu mujtamaca wadankaas u bedelo hab iskaashi kana dhaadhicinayey xoogsatadahalkaas ku dhaqnayd faa'iidada ugu jirta mabda' iskaashiga ah. K. Marx wuxuu yidhi asaga oo xiganaya dadaalkii culumadaas siiba Robert Owen waxuu ahaa mid lama iloobaan ah abuurayna mirihii iskaashatooyinka. Waxaa ayana door fiican ka waday dhinaca iskaashatoolinka 1760 — 1837 Saint Simon iyo Charles Fourier. Taas oo soo noolaysay taariikhda dhaqdhaqaaqa iskaashatooyinka mar labaad oo ay soo rogaal celiyeen waxaana dhalatay iskaashato nooca cusub (Rochdole) kana dhashay meelaha warshadaha leh ee shaqaaluhu joogo maadaama shaqaaluhu yahay horumoodkii xoogsatada aynu u Horseedaan qaybaha kale dhaqdhaqaaqa ay ku raadinayaan xuquuqdooda mid siyaasadeed iyo tu dhaqaaleba. Iskaashatooyinka noocaasi waxay bilowdeen 1840 waxaana asaasay 28 Qofood oo shaqaale ahaa, iskaashatadaas oo hirgashay 24-10-1844 ujeedadeeda ugu wayna ahayd in ay ka nabadgeliso xubnaheeda ciriirigii iyo kadeedkii xad-dhaafka ee ay ku hayeen maalqabeenku xagga sicirka cuntada iyo waxyaabaha kale ee loo baahanyahay. Mabaadiida saldhigga u ahayd iskaashatadaas waxaa ugu waaweynaa:

1. In la gado badeeco tayo fiican miissan iyo mitir sax ah.

2. In badeecada lagu gado gacansaar (cash) sicirkuna ahaado mid dhexdhexaad ah.

3. Faa'iidada in loo qaybsanayo mugga gadashadiisa (Inta uu ka gato dukaanka iskaashatada ayuu faa'iidadeeda helayaa qofku)

4. Faa'iidada iskaashatadu hesho qaarkeed waa in wax lagu baro xubnaha iskaashatada .

5. Waa in qof kasta xor u yahay coddhiibashada (qofkii hal cod).

Haddaba waxaad aragtaan in iskaashatooyinku heleen qodobo ay ku hirtaan si ay u fahmaan micnaha iyo faa'iidooyinka iskaashigu leeyahay taas oo dhalisay in si deg-deg ah ugu fido dhismaha iskaashatooyinku Yurub. 1913kii waxaa lagu qiyaasay dadka ku jira iskaashatooyinka 3.000.000 oo Xubnood 1914kii waxay gaareen 7.000.000; wadankaas Ingiriiskana waxaa ka furaa in ka badan 1.000 Iskaashato. Arrimahaas oo idil waxay dalalka dunida oo dhan ku baraarujiyeen hirgelinta iyo qiimaha iskaashatooyinku u leeyihiin bulshada.

## ISKAASHATOOYINKA NOOCA CUSUB

Waqtigaas ka dib waxa aad adduunka ugu fiday fikrada iskaashiga. Ayada oo shaqaalaha iyo beeralayduba uga gaashaamanayaan dhiigmiirka.

Haddaba waxay aad u dhabowday una hirgashay dhismaha Iskaashatooyinku markii ay xukunkii la wareegtay xoogsatada aaminsan nidaamka H/Wadaagga ah kuwaas oo kacaankoodii ugu horreeyey ka riday wadankaas midowga Soofiyeeti, markaas oo ummadihii dulmanaa qaarkood heleen hab iskaashi oo leh dhiirigalin xag qalab-dhul farsamo kana maran cadaadis tartan dhaqaale iyo iska horjeed bulsheed taasoo keentay in iskaashatooyinku bataan tiradooda iyo tayadoodaba aanu dhasho iskaashi Caalaminimo waxaana dhashay hay'ad sare ee ka dhaxaysa iskaashatooyinka Adduunka saldhigeeduna yahay LONDON waddanka Ingriiska, haatana

ku jiraan dad ka badan 300 Milyan oo xubnood.

Fadhigii 22aad ee ururkaas oo lagu qabtay Mosko waxay ka doodeen in Maabaadi'dii iyo qodobadii «Rochdale» yihiin kuwa u qalma waqtigaan aan joogno xaalkaas oo gudi loo saaray waxay keeneen fadhigii guud ee ururka ee 23aad qodobadaan soo socda layskuna raacay ayada oo la tixgelinayo mabaadiidii Leenin ee xagga iskaashi.

1. In soo Gelitaanka Iskaashatadu yahay khiyaari aysan jirina wax ku khasba ama ka cesha xag bulshanimo, siyaasadeed, qabiilnimo, diineed iyo mid midaba, waxaana geli kara qof kasta oo raba diyaarna u ah shaqadeeda rabana in uu fuliyo mas'uuliyada xubinnimada.

2. Iskaashatadu waa urur dimoqraadi ah, arrimaheedana waxaa u wadaya dad gudi ah oo ay ka doorato xubnaheeda; xubnuhuna waxay xuquuq siman u leeyihiin codka, doorashada iyo la socodsiinta xisaabaadka iskaashatadooda.

3. In la dhigto saami isku mid ah faa'iidadana loo qaybsado si siman ayada oo la tixgelinayo shaqadii qofku qabtay.

4. Iskaashato walba waa in ay lahaato tala gal dhaqaale ay wax ku barto xubnaheeda shaqaalaheeda iyo caam ahaan bulshada .

5. Ururada iskaashatooyinka oo dhan waa inay yeeshaan wada shaqayn daakhili ah mid wadanaya iyo mid caalami ahba.

Sidaa darteed si dhahkso ah bay u koreen iskaashatooyinka waddamo badan. 1928 - Waxay noqdeen dadka ku jira iskaashatooyinka Jarmalka in ku dhow 3 Milyan Faransa 2 Milyan, Ruushka 2 Milyan, Iskaashatooyinka waxaa u horumaray kuwa quudka (Shaqaalewarshad) ka dibna waxaa soo ifbaxay farsamada, Beeraha iyo kaluunka.

Iskaashatooyinka quudka waxay camalkooda iyo isutagooda u arkayeen in sicir macquula ah xubnahoodu wax uga gadaan.

Iskaashatooyinka beeraha si iskumar ah bay u soo baxeen khasatan kuwa suuqaynta iyo iibinta miraha beeraha dhulalka la gumaysann jiray dhaqdhaqaaqa iskaashatooyinkoodu waxay la socdeen hadba waqtiga ay qaataan xorriyaddooda, habka ay ku hirgaliyaan horumarkoodu iyo saldhiga dhaqaalahooda.

Gumaysiguna waa ka soo horjeeday fikrada iskaashiga si ayan uga dhalan awood dhaqaale ama siyaasadeed oo ka soo hor-jeesata. Laakiin waddan walba waa lahaa iskaashi hidde iyo dhaqan oo ay kula diriraan dabeecada adag ee ku xeeran.

Maadaama Soomaaliya ay ka mid tahay wadammada soo kacaytaariikh aad u fog ma lahayn iskaashatooyinku. Intii gumaysiga ka horraysay beeralayda iyo xooladhaqatada Soomaaliyeed waxay ahaayeen kuwo ku nool habkii hore ee wax soo saarkiisu hooseeyey waxayna lahaayeen iskaashi caado iyo hidde ah, beero wada falid, xoolo wada-shubid iyo isgarabsi xagga daafaca dugaagga, badanaaba wax cadaadis iyo isku dulnoolaad ma jirin oo dhaafsiisan kan dabeecadu u keento. Ganacsiga iyo kalluumeysiguna waa liiteen, farsamaduna ma horumarsanayn. Waqtigii gumeysigu yimid wax horumar ah ma keenin, bal wuxuu la yimid dhac, dil, iyo dhiigmiir uu ku sameeyo beeraleydii iyo xoolo dhaqatadii Soomaaliyeed. Iskaashigii caadada ahaana waxuu ku baddalay in Beeralaydii uga shaqayso dhulkii uu ka dhacay, kaluumaysataduna ugu soo jilaabta warshado yar-yar oo burjuwaasiyada gumaysigu ka samaysatay Xeebaha, ayaga oo aan lahayn wax xuquuqa ah oo jiritaankooda dhaa'san taas oo ku khasabtay inay u noqdaan addoon xag dhaqaale iyo mid maskaxeedba.

Halgankii dheeraa ee ummaddu u soo martay gobannimadeeda kuna soo dhacsatay cududdeeda iyo maskaxdeeda wax quman iskama baddalin dhibaatadii haysatay xoogsatadeena, iskaashatooyinkii dhashayna waxay noqdeen.

a) Kuwo lagu xado hantida dadweynaha (dayn aan wax lagu soo saarin soona noqon).

b) Dadkii runta ahaa oo aan galin beeralayda yar yar kalluumaysato iwm. Waxaana ka mid ahaa Wasiiro-mudanayaal iyo qabiil.

t) Waa lagu horjoogsaday iskaashatooyinkii dhabta ahaa.

c) Wax sharci ah oo nidaamiya ma jirin.

Halkaasna waxaa horey uga sii socday cadaadiskii lagu hayey danyarta Soomaaliyeed. Sababahaasna waxay ugu horreeyeen kuwii uu ka dhashay Kacaankii 21 Oktoobar.

Kacaankii Oktoobar wuxuu dhidibbada u aasay noocii runta ahaa ee iskaashatooyinkii Ummaddu u baahnayd, kuwaas oo daryeelaya danaha danyarta muruqmaalka ah, waxaana loo soo saaray sharciyo adag oo habaynaya danahooda sida sharciga 40aad ee horumarinta iyo dhiirrgalinta iskaashatooyinka kan 73 ee xaddidaya lahaanshaha dhulka 30 hektaar, waraabka 60 hektaar roobka qoyskiiba, iskaashatooyinka iyo beeraha dawladda lama xaddadin inta ay awoodaan oo dhulabay qaadankaraan shuruuda oo ah tacabka oo ay koordhiyaan tiro iyo tayaba. Himilooyinka laga leeyahay in iskaashatooyinku fushaan waxaa ka mid ah.

1. Tacab kordhinta
2.Isu soo dhoweynta farqiga u dhaxeeya miyiga, iyo magaalada

xagga tacliinta, caafimaadka ilbaxnimada quman IWM.

3. Abuuritaan kaadir leh wacyi siyaasi ah iyo farsamo cilmeysan. jeed bulshadeena dhexdeed.

4. Iyo in lagala dagaallamo waxyaabaha bulshadeenna dib u dhigaya oo dhan sida qabiilka, jahliga iyo ku abuurida cilaaqaad ka maran is-naceyb iyo iska soo hor

Iskaashatooyinkeenu waa fusheen himilooyinkaas inkasta oo ayan gaarin heerkii loo baahnaa. XHKS isaga oo hoggaaminaya bulshadeenna oo dhan waxuu muhimad lama iloobaan ah siiyey kor u qaadidda iyo dhiirrigalinta iskaashatooyinka inta Xisbigu dhashayna tilaabo weyn bay qaadeen, tirada guud oo iskkaashatooyinku maanta jira kana diiwaangashn heer Qaran waa 345 iskaashato xubnaha ku jiraana waxay dhan yihiin 37.313 haddii aan beeraha oo keliya soo qaadano waa 258 iskaashato oo isugu jira ujeeddo badan 47 tacab wadaag 211 xubnaha ku jira iskaashatooyinka beeraha waa 25.984.

Tirakoobkaan kuma jiraan iskaashatooyinka ka jira heer dagmo iyo mid gobol. Waa jiraan dhibaatooyin hortaagan iskaashatooyinka lagamamaarmaana tahay in la xalliyo sida maalgalinta iyo qalabka oo ku yar, garaadkooda siyaasiga ah farsamadooda oo wali gaarin heerkii loo baahnaa iyo hay'ada badan oo kala xukuma oo qaarkood ku abuuraan qas iyo dib u dhac.

Haddaba iskaashatooyinku waxay soo gaareen heer ay u bislaadeen inay dhistaan ururkoodii gaarka u ahaa kaas oo ka caawin doona:

1. Fulinta barnaamijka iyo xeerka Xisbiga.

2. Difaaca danaha iskaashatooyinka

3 Hoggaaminta Aydolojiyada hantiwadaagga ah.

4 Fulinta Qorshaha Qaranka.

5. Hagaajinta cilaaqaadka ururrada bulshada gudaha iyo dibaddaba.


Sidaas daraaddeed ayaa loo diyaarinayaa shir weynihii ururrada iskaashatooyinka si ay isu soo garabnayn. Waqtigii gumeysi talay mid taagaan ururrada bulshada ee ka dhisan waddankeena.

# WAXAANU HAMBALYO JAALLENIMO U DIRAYNAA SHIRWEYNAHA AASAASKA URURKA DHAQDHAQAAQA ISKAASHATOOYINKA SOOMAALIYEED

## GUDDIDA QORAALKA EE WARGEYSKA HALGAN

## NOLOSHA XISBIGA

# Xoghayaha Guud ee XHKS oo Ceel Jaalle Tababar ka furay



Waajibaadka waaweyn ee Kacaankii 21kii Oktoobar is-hordhigay waxaa ka mid ah in kor loo qaado kasmada iyo garaadka dadweynaha Soomaaliyeed, si ay awood ugu yeeshaan horumarinta noloshooda iyo ka talinta arrimaha siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsheed ee dalka. Kooxaha ay bulshadu ka kooban tahay koox kasta gaar ahaanteeda ayaa loo abaabulay, loona dejiyey hab cad oo ay u shaqeeyaan iyo qorshe garaadkooda kor loogu qaado.

13kii Disembar 1977kii Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu xarunta Ceel - Jaalle ee Degmada Marka tababar uga furay 299 qof oo ka kooban nabadoonno, samadoonno iyo culamaau'diin, kuwaasoo ka kala socday gobollada dalku uu ka kooban yahay.

Tababarkaas waxaa qabanqaabisay Wasaaradda dawladaha Hoose iyo horumarinta reer miyiga, waxaana loogu talagalay in ay dadkaasi muddo 45 beri ah ku qaataan casharro kor loogu qaadayo kasmadooda xagga siyaasadda iyo xagga maamulka hawlaha dadweynaha taasoo u suurta gelinaysa inay uga sii faa'iideeyaan dadweynaha reer miyiga ah, marka ay dib ugu laabtaan meelihii ay ka kala yimaaddeen.

Xoghayaha guud ee XHKS Jaalle Siyaad khudbad qaaya leh oo halkaas uu ka jeediyey wuxuu si ballaaran uga warramay halgankii dheeraa ee ay ummadda Soomaaliyeed u soo gashay gobannimadeeda, xaaladdii uu dalku ku sugnaa kacaankii 21kii Oktoobar, 1969kii ka hor iyo horumarka dhinac walba ah ee la gaaray muddadii kacaanku dalka majaraha u hayey.

Jaalle Siyaad wuxuu khudbadiisaa ku soo qaadey siyaabihii gumaysigu dalkayaga ku soo galay , sidii uu u kala qaybiyey ummadda Soomaaliyeed iyo dhibaatooyinkii uu dhaxalsiiyey. «Haseyeeshee dadwaynaha Soomaaliyeed oo geesiga ahi wuu ka dhiidhiyey arrintaas, wuxuuna bilaabay dhaqdhaqaaqyo gobannimadoon ah, taasoo suurtagal ka dhigtay in ay xoroobaan sannadkii 1969kii gobollo ka mid ah dhulwaynihii Soomaaliyeed ee gumaysigu kala qaybiyey», ayuu yiri Xoghayaha Guud.

Madaxweynuhu wuxuu mar kale caddeeyey sabibihii dhaliyey iyo guulihii uu soo hooyey kacaankii 21kii Oktoobar. «Talloolooyinkii ugu horreeyey u kacaanku qaaday si loo daryeelo danaha bulshada waxaa ka mid ahaa la dagaallanka 3da cadow ee ka soo horjeeda no-

losha aadamiga oo kala ah: Aqoondarrada, Gaajada iyo Cudurka. Kuwaas uu kacaanku u arkay cadow hortaagan nolosha dadweynaha», ayuu yiri Jaalle Siyaad.

Xoghayaha Guud ee XHKS wuxuu shaaca ka qaaday foolxumada qabyaaladda wuxuuna si buuxda u cambaareeyey dadka ku adeegta oo uu ku tilmaamay «Iimaan-laawayaal, shakhsi-daciif ah iyo iskuma kalsoocnayaal».

Isagoo caddaynaayey mowqifka xaqa ah ee ay Jamhuuriyadda dimoqraadigga Soomaaliya ka taagan tahay qaddiyadda shacbiga Soomaaliyeed ee ka gilgilnaaya gumaysigu taliska Adis-Ababa, Jaalle Siyaad wuxuu ku hadalqabsaday baaqii caddaa ee Muqdisho baaqaasoo ka soo baxay Madaxda Afrika, qodobbadiisana ay saldhig u ahayd in gacan buuxda la siiyo dhaqdhaqaaqyada Afrika ee u halgamaaya madaxbanaanidooda, iyo sida keli ah ee gumaysiga lagu ciribtiri karaa inay tahay halgan hubaysan.

Xoghayaha Guud wuxuu khudbadiisaa qiimaha leh ku soo gabagabeeyey guubaabo uu dadkii halkaas tababarku uga furmay ku guubaabiyey in ay ku dadaalaan ka faa'iidaysiga tababarkaa iyo inay uga faa'iideeyaan walaalahooda Soomaaliyeed ee ku nool degmooyinkii ay ka yimaaddeen, fursadna aan u helin inay ka qaybgalaan tababarka noocaas ah.

Furitaankii tababarkaas oo ay goobjoog ka ahaayeen madax sare oo ay ka mid yihiin guddoomiyeyaal Hoggaammo, wasiirro, xildhibaanno kale oo ka tirsan golaha Dhexe ee XHKS iyo madaxda Gobolka SH-Hoose, waxaa Xoghayaha Guud ka hor khudbad soo dhawayn iyo war-bixin isugu jirtay ka jeediyey Wasiirka Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer-Miyiga Jaalle G-Le Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abuukar.

# SHIRAR LAGU FALANQEEYEY ARRIMAHA GEESKA AFRIKA

Laga soo bilaabo dabbaaldeggii Sannadguuradii 8aad ee kacaanka, oo ku soo beegantay 21kii Oktoobar 1977kii, Jaalle Siyaad wuxuu Ummadda Soomaaliyeed iyo adduunweynahab u soo jeediyey khudbado taariikhi ah khudbadahaas oo madax waynuhu ka soo jeediyey dhowr munaasabadood oo kala geddisan, ee ay ka mid ahaayeen dabbaaldeggii sannadguuradii 8aad ee Kacaanka, ciiddii Al-Adxaa iyo bannaanbixii dadweynuhu Soomaaliyeed ku taageerayey go'aannadii taariikhiga ahaa ee ka soo baxay Golaha Dhexe XHKS 13kii Nofembar, 1977kii. Khudbadahaa Jaalle Siyaad wuxuu shaaca uga qaaday arrimo waaweyn oo la xiriira aayaha jiritaanka ummadda Soomaaliyeed iyo guud ahaan wanaagga shucuubta adduunka ku dhaqan, siiba kuwa weli u halgamaaya in ay aayahooda ka taliyaan.

Arrimihii ugu sii xiise badnaa ee khudbadahaa dadkii dhegaysanayey soo jiitay waxaa ka mid ahaa xaaladda geeska Afrika iyo xiriirkii saaxiibnimo ee Soomaaliya, iyo Midowga Soofiyeeti oo xumaaday, inkastoo Jaalle Siyaad Arrimahaas si caddaan ah diirka uga qaaday, haddana waxaa jira dad war - xumatashiil, dibusocod iyo daba-dhilifyo ah oo iskudayey inay uga faa'iidaystaan danahooda foosha xun. Taasina waxay noqotay wax iska caadi ah mar kastoo kacaanka Soomaaliyeed go'aan cusub si geesinimo ah ugu tallaabsado dibusocodka iyo war-xumo tashi'lku inay isku dayaan inay go'aankaas si qalloocan u fasiraan, si ay dadweynaha jaha wareer ugu ridaan, tubta toosanna uga leexiyaan.

Markii uu soo baxay go'aankii 13kii Nofember, ee ku saabsanaa tallaabooyin cusub oo laga qaaday xiriirkii JDS ay la lahayd dalalka Midowga Soofiyeeti iyo Kuuba, ka dib markay dalalkaas la safteen gumaysiga taliska fashiistaha ah ee Addis-Ababa, dibusocodka waxay dadweynaha ku dhex faafiyeen dacaayad oranaysa «Ruush iyo hantiwadaaggiisii waa la isla cayriyay» iyagoo hantiwadaagga ka dhigaaya wax Ruush leeyahay isla markaasna mabda'aas xalaasha ah ku dhaleecaynaaya gafafka ay Dawladda Ruushka ka galayso gobannimadoonka ee runtii ah gafafka ay hantiwadaaggu qudhiisa ka gelayso

Haddaba runta dacaayadahaas iyo kuwa kaloo ku hoos jiraba si dadweynaha looga daaweeyo xarunta Dhexe XHKS waxaa laga qabanqaabiyey barnaamij hanuunin ah oo loogu tala galay in dadweynaha ku nool gobolkaan Banaadir looga dhaadhiciyo dhuuxii ay ku qotameen iyo falsafada ka dambaysa khudbadihii Xoghayaha Guud ee aan kor ku soo xusnay.

Iyadoo barnaamijkaa la fulinaayo, toddobaadyadii ugu horreeyey bisha Disembar 14ka Degmo ee Gobolka Banaadir iyo dhammaan Xaafadaha ay ka kooban yihiinba waxaa laga qabtay shirar ay ka soo qaybgaleen dadweynaha halkaas ku nool. Shirarkaas qaybtoodii hore oo heer degmo ahaa waxaa

khudbado ballaaran ka jeediyey Jaallayaal ka tirsan Xubnaha Golaha Dhexe ee XHKS, qaybtii Labaad oo heer Xaafadeed lagu qabtayna waxaa faahfaahin kale ka jeediyey Jaallayaal ka tirsan hawlwadeennada hoggaammada Golaha Dhexe e XHKS.

Khudbadahaa dadweynaha waxaa si aan caadsaarnayn loogu qayaxay ujeeddooyinka qotada dheer ee ay ku fadhiyaan khudbooyinkii Xoghayaha Guud waxaana lagu baraarujiyey inay ka digtoonaadaan dacaayadaha raqiiska ah ee ay fidinayaan dibusocodka iyo kacaandiidku. Waxaa si gooni ah dadweynaha loogu iftiimiyey meelaha ay war-xumatashiilku madmadowga gelinayaan, ama sida xun ee ay u fasiraayaan, meelahaasoo la xariira qaddiyadda xaqa ah ee dadka Soomaaliyeed iyo xiriirka xumaaday ee Soomaaliya iyo Midowga Soofiyeeti.

Dadweynaha waxaa meelahaas lagu xusuusiyey taariikhdii gumaysiga Xabashida iyo siyaalihii uu ku qabsaday dadyowga maanta la halgamaya sidii uu uga sheekeyay Jaalle Siyaad; halkaasoo ay ka soo baxayso dabeecadda dhabta ah ee dagaalka Geeska Afrika, taasoc ah in uu yahay dagaal gobannimadoon, oo ay isku xoraynayaan dadyow muddo dheer, addoonsi lagu khasbyey. Soomaaliyana waxay ku socotaa siyaasaddeedii ay caddaysatay isla markii kacaanku ka curtay, mabda'a hantiwadaagguna farayo taasoo ah taageerada dadyowga gobannimadoonka ah u halgamaaya.

Waxaa kaloo shirarkaasi dadweynaha loogu caddeeyey sababihii keenay in lagu talaabsado go'aanadii 13kii Nofembar lagu gooyey xiriirkii diblomaasiga ee aynu la lalahayn dalka Kuuba, isla markaasna lagu buriyey heshiiskii saaxiibnimo ee ka dhexeeyey JDS iyo dawladda Midowga Soofiyeeti, khu baraadoodii oo dalka laga saaray iyo fududayntii ciidammadooda Soomaaliya looga oggolaa oo la joojiyey. Waxaa la sii faahfaahiyey sababaha tallaabadaas kallifay inay yihiin dawladahaas oo si caddaan ah ula soo saftay gumaysiga xabashida, si ay u baabbi'iyaan dadyowga gobannimadoonka ah. oo ay ka mid yihiin dad Soomaaliyeed iyo iyagoo ka qaybgalay duullaan la doonaayo in lagu soo qaado Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

HAWLAHA GUDDIYADA XISBIGA EE GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA

# Degmada Luuq Ganaane iyo Taariikhda Dhaqdhaqaaqa XHKS

Bishii September 1976kii ayaa taariikhda Degmada Luuq Ganaane markii ugu horaysay waxaa irdaha loo furay Xisbiga nooca cusub ah ee XHKS. Sidii degmooyinka kaleba ka dhacday ka dib markii muddo aan yarayn loo soo gogol xaadhay, kormeerro isdaba joog ahna lagu sameeyey ayaa taariikhdaas kor ku xusan waxaa rasmi ahaan loogu dhawaaqay guddigii XHKS ee degmada Luuq Ganaane iyo laamihii uu u kala baxaayey oo mid waliba loo caddeeyey xilkeeda.

Markaas ka dib waxaa loo hawl galay sidii ay ku dhismi lahaayeen Unugyada iyo Gucumada Xisbigu ku yeelanaayo meelaha shaqada iyo tacab soo saarka iyo meelaha degaanka, sida xaafadaha iyo tuulooyinka ay degmadu ka koobantahay waxaa degmadaas ka dhismay 6 Unug 4 Gucun; kuwaasoo sida la ogyahay iyagu ahaa saldhigga shaqada xisbiga.

Tallaabadii xigtay ee xagga dhismaha laga qaadayna waxay ahayd dib u habayntii ururrada bulshada, kuwaasoo ah xoogga uu ku tiirsan yahay xisbigu, una dhexeeya isaga iyo dadweynaha.

Ururka XHKS ee Degmada Luuq markii uu sidaas u dhismay wuxuu dhaqdhaqaaqiisa ka bilaabay dhuuxidda iyo ka baaraandeggidda Xeerka iyo Barnaamijka Xisbiga. Iyadoo xoog la saaray sidii dhammaan xubnaha Xisbiga si habsami ah ugu fahmi lahaayeen, fahmiddaasoo ah jidkii loo marayay ku dhaqmidda xeerka iyo hirgelinta Barnaamijka Xisbiga, si taas looga yool gaaro waxaa la furay tababarro, doodo, iyo aqoon-is-weydaarsiyo is daba joog ah, dhammaan Xubnaha Xisbiga waxaa loo habeeyay waxbarasho joogto ah oo laba weji leh: waji loogu tala galay kordhinta garaadka siyaasiga ah iyo mid loogu talagalay kor-u-qaadidda aqoontooda guud ama waxbarasha caadi ah. Sidaa si la'eg waxaa loogu dadaalay kordhinta garaadka ururrada Bulshada, taasoo u fududeysay gudashada xilkooda Kacaannimo Guddiga Xisbiga Degmada luuq waxqabadka kuma koobin oo keliya hawlaha Siyaasadda ee aan soo sheegnay; guddiga Xisbiga mar hadduu yahay hoggaamiyihii degmada, dadaal kalama harin sidii uu u gudan lahaa xilka ka saaran daryeelka dhaqaalaha degmada iyo dhiirrigalinta

tacab soo saarka. isagoo ka shidaal qaadanaaya go'aammadii kalfadhigii 3aad ee golaha Dhexe XHKS iyo kuwii ka soo baxay guddiga Siyaasiga ah iyo golaha wasiirada, go'aammadaasoo ah kuwii ku saabsanaa kordhinta tacabka iyo guud ahaan horumarinta dhaqaalaha dalka si loo gaaro iskufillaansho, Guddiga Xisbiga wuxuu dejiyey qorshe degmo oo kala dambeeya laguna tala galay hirgelinta go'aamadaas kaalinta ay uga abbaaran tahay degmada Luuq Ganaane.

Waxaa la sameeyey Barnaamij loogu tala galay baraarujinta beeraaleyda, iyadoo loo faahfaahinaayay go'aamada kor ku xusan, laguna dhiirrigeliyay kordhinta tacabka, waxaa la abuuray beero ay leeyihiin ururrada Bulshada (Shaqaalaha, Dhallinyarada, Haweenka), si ay beeraaleyda ugu noqdaan ku dayasho wanaagsan ama darsi la taaban karo.

# Degmada Ceel–Waaq iyo siduu uga taabbagalay XHKS

Sida degmooyinka kale ee Dalka, degmada Ceelwaaq waxaa ka taabba galay dhismihii XHKS iyo unugyadiisii 10 (toban) unug iyo 3 gucun.

Guddiga Xisbiga ee degmadaasi markii uu dhismay wuxuu isugu yimid shirar uu ku dejinaayo qorshe shaqo oo ballaaran, muddana socda. Qorshahaasi guud ahaan wuxuu ku salaysnaa in xoogga la saaro laba arrimood oo muhiim ah, labadaasoo kala ah:

1. Kordhinta tacab soo saarka
2. Kor u qaadidda garaadka siyaasiga ah ee guud ahaan dadweynaha, gaar ahaanna xubnaha xisbiga iyo hawlwadeennadiisa.

Qodobbadii qorshahaas muujinayey ee guddiga xisbiga degmada Ceelwaaq go'aanka ku gaaray waxaa ka mid ahaa:

a) In tababarro loo furo dhammaan ururrada bulshada shaqaalaha, dhallinyarada iyo haweenka tababarradaasoo midkiiba socdo muddo 45 beri ah; taasoo looga jeedo in kor loo qaado garaadka siyaasadeed ee Jaallayaasha ku jira ururrada bulshada.

b) In bishiiba hal mar kormeer guud lagu sameeyo dhammaan tuulooyinka ay degmadu ka kooban tahay, iskaashatooyinka iyo meel kastoo wax laga soo saaro.

j) In si adag loo kormeero meelaha ay ka soo galaan dhaqaalaha dawladda.

x) In lagu dadaalo abuurista iyo hirgelinta iskaashatooyinka iyadoo la tixgelinaayo duruufta gaar ahaaneed ee degmada.

Kaasi wuxuu ahaa qorshihii guddiga Xisbiga Degmada Ceelwaaq, ugu tala galay gudashada xilka ka saaran hoggaaminta degmada iyo horumarinta bulshada ku nool guud ahaan. Haddiise aan u soo noqonno tallaabooyinka laga qaaday kobcinta garaadka iyo aqoonta xubnaha xisbiga waxay yihiin qaar wax ku ool ah. Iyadoo la fulinaayo tusaallooyinkii Xoghayaha Guud ee Xisbiga Jaalle Siyaad, ee ku saabsanaa waxbaridda joogtada ah ee xubnaha xisbiga, ayaa waxaa xubnaha xisbiga degmada Ceelwaaq waxaa loo furay tababarro kala jaad ah iyo waxbarasho joogto ah. Tababarradaas waxaa ka mid ahaa:

1. Tababarro 30 beri ah oo loo furay bishii Nofembar, 1976kii, kuna saabsanaa barashada Xeerka iyo Barnaamijka XHKS.
2. Tababarro 15 beri soconaayey oo loo furay bishii Jannaayo 1977kii, kuna saabsanaa habka maamulka arrimaha xisbiga iyo hawlaha la xiriira.

Tababarradaas gaagaaban kasokow, Xubnaha Xisbiga waxaa loo furay waxbarasho joogta ah oo kor loogu qaadaayo heerka aqoontooda. Waxbarashadaas waxaa lagu habeeyey laba heer, oo kala ah dugsiga Dhexe iyo kan Hoose.

## Ururrada Bulshada

# Dhaqdhaqaaqa Dhallinta shaqaysa

Kadib markii la dhammaystiray dhismihii hay'adaha sare ee Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed, waax kasta oo ka mid ah waaxaha Ururku waxay bilawday in ay dhigato qorshe shaqo, kuna dhaqaaqdo abaabulidda iyo hawlgelinta xubnaha dhallinyarada ay mas'uulka ka tahay.

11kii Bishaan Diiseembar, Xarunta Ururka DH.K.S. waxaa lagu qabtay shir muhiim ah oo ay ka soo qaybgaleen guddoomiyaha Ururka dhallinyarada Soo-

maaliyeed iyo Guddiga Fulinta iyo dhammaan xubnaha dhallinta shaqaysa ee gobolkan Banaadir.

Shirkaasi wuxuu ahaa mid lagu soo gunaanadayey hawlo dhaowr toddobaad soo socday oo la xiriira xubin qaadashada, iyo dhismaha gudiyada dhallinta shaqaysa. Xoghayaha Waaxda dhallinta shaqaysa iyo iskaashatooyinka ee U.DH.K.S. ayaa halkaas ka soo jeediyey qorshaha shaqada ee loogu talo galay dhallinta shaqaysa sannadkan cusub iyo isla markaas Jaallayaashii loo gartay in ay noqdaan xoghaynta sare ee dhallinta shaqaysa; waxaa kaloo halkaa laga caddeeyey qaabka ay u dhisan yihiin 6da Urur ee ay u sii kala baxaan dhallinta shaqaysa iyo Jaallayaashii loo doortay in ay ka noqdaan gudoomiyaal iyo ku-xigeenno.

Shirkaas waxaa khudbad ballaaran ka jeediyey guddoomiyaha Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaailyeed Jaalle Maxamed maxmuud Warsame kana tirsan Golaha Dhexe ee XHKS, khudbaddaasoo isugu jirtay hambalyo, hogatusaalayn iyo kaalinta maanta laga sugaayo marxaladdan taariikhiga ah ee ay marayso Ummadda Soomaaliyeed, wuxuu ku nuuxnuuxsaday marxaladdan la marayo iyo dhammaan amuuraha la xiriira, taasoo uu dhallinyarada ku guubaabiyey in ay gartaan waajib ka saaran culayskiisa.

dhaqdhaqaaqyada kale ee dhallinyaradu Bishii Diisambar samaysay waxaa ka mid ahaa taageero waxqabad ah oo ay si lixaad leh ugu gurmadeen dadweynaha ku nool Gobolkaan Banaadir qaarkood oo la kulmay khatar kaga timid weerar dabeecadeed. Dadkaas qaarkood waxaa khatar geliyey roobab fara badan oo bisha horraantee. dii magaala madaxda ka da'ay, kadibna guryihii meelaha hooseeya ku yiil biyo qaadeen, hase yeeshee waxaa lagu badbaadiyey gurmad aan loo kala harin. Waxaa kaloo jirtay xaafad ka mid ah Degmada X-Jabjab oo ay ku soo foolyeelatay khatar kaga timid bacaad guuraya. Bacaadkaas waxaa ka hortegay dhallinyarada Gobolkan Banaadir oo ku qaadday Olole Bacaad celin ah oo soconayey muddo dhawr todobaad ah, wayna ku guuleysteen.

# Ururka Shaqaalàha Gobolka Banaadir oo tallaabooyin hore u qaaday

Shirweynihii ugu horreeyey ee uu yeesho ururka shaqaalaha gobolka Benaadir ayaa 12kii Diisembar, 1977kii ka furmay Xarunta ururkaasi ku leeyahay magaalada Xamar. Shirweynahaas waxaa ka horreeyey shirar heer degmo ah oo lagu qabtay dhammaan degmooyinka uu ka kooban yahay Gobolka Benaadir taariikhdu markay ahayd 2 - 12 - 1977kii. Shirarkaas iyaga ah ururka Shaqaalaha ee Degmooyinku waxay uga doodeen muddadii ururka soo dhisnaa hawlihii la fuliyey, kuwii fuli waayey iyo sababihii ay la fuli waayeen.

Markaas ka dib ayaa la isugu yimid shirweynahaas heerka gobol ah oo ay ka soo qaybgaleen ergooyin ka kala yimid ururrada shaqaalaha ee 14ka degmo iyo guddiga fulinta ururka shaqaalaha gobolka iyo Jaallayaal ka tirsan xoghaynta sare ee xiriirka guud ee ururrada shaqaalaha Soomaaliyeed. Waxaa kaloo marti ahaan goob joog uga ahaa ergooyin ka socday ururrada dhallinyarada iyo Haweenka ee Gobolka, kuwaasoo Jaallayaashooda shaqaalaha ah taageero iyo bogaadin u soo jeediyey. Intii Shirku socdey oo dhan waxaa Barnaamij tusaalayn, murti iyo maaweelo isugu dhafan ka dhex wadey ubaxa Kacaanka ee Degmooyinka Waaberi, Hawl wadaag, Shibis, Yaaqshiid iyo Dayniile, taasina waxay muujinaysaa isbahaysiga iyo wada shaqaynta Jaallenimo ee ka dhexaysa ururka dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed iyo xiriirka guud ee ururrada shaqaalaha Soomaaliyeed.

Shirka waxaa furay, khudbad qiima leh, oo guubaabo iyo hogo tusaalayn isugu jirtay ka jeediyey Xoghayaha Xisbiga gobolka Benaadir Jaalle Yuusuf Ibraahim Abuuraas oo ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS. Ka dibna waxaa la dhegaystay warbixannadeedii ay soo diyaariyeen ururrada shaqaalaha degmooyinka iyo Guddiga fulinta ee ururka shaqaalaha gobolka.

Shirka ajendihiisa waxaa ugu weynaa dersid hawlihii la soo qabtay intii ururku soo jiray iyo dejin qorshaha sannadka cusub ee shaqada ururka shaqaalaha gobolka Benaadir. Qorshaha cusub ee shirkaas lagu oggolaaday wuxuu xoog saarayaa tababarro kala geddisan oo la siiyo xubnaha shaqaalaha gobolka Benaadir: tababarradaasoo shaqaalaha u suurta galinaaya in ay kaalin muuqata ka geystaan horumarinta bulshada. Tababbarrada la qorsheeyey waxaa ka mid ah:

— 480 ka mid ah shaqaalaha gobolka in la siiyo carbis barenimo, si ay macallimiin uga noq-

daan hirgelinta barnaamijka joogtaynta ololaha farbarashada ee ka socda Degmooyinka gobolka Benaadir; hawshaas ururku wuxuu la kaashaday Wasaasaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

— 200 in loo carbiyo gargaarka degdegga ah iyo ka hortagga cudurrada faafa, arrimahaasna waxaa lala kaashanayaa Wasaaradda caafimaadka.

— Xubno ka tirsan guddiyada xaafadaha oo tiradoodu dhan tahay 201 iyagana waxaa la barayaa sharciyada looga hortago suuqa xaaraanta ah, arrintaas waxaa lala kaashanayaa Hoggaanka ilaalinta canshuuraha ee Ciidanka Boliiska.

— 60 qof waxaa loo tababarayaa ilaalinta nabadgelyada waddooyinka iyo sharciyada loo raaco, si ay hawshaas u qabtaan mararka ay jiraan bannaanbaxyada iyo munaasabadaha la midka ah, taasna waxaa lala kaashanayaa boliiska waddooyinka.

— 42 qof iyagana waxaa loo carbinayaa maamulka xafiisyada, si xafiisyada ururka loogu helo kaadar u bisil socodsiinta hawlohooda, arrintaasna waxaa lala kaashanayaa Machadka SIDAM.

Isla munaasabaddaas waxaa shahaadooyin aqoonsi lagu abaalmariyey 400 oo Jaalle oo ka mid ah shaqaalihii halganka dheer soo galay. kartida siyaada ahna muujiyey.

GUDDIYADII SHAQAALAHA XAAFADAHA OO LA DHISAY

Dhismaha xiriirka guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu hore ugu ekaa heer degmo. Hase yeeshee bartamihii bisha Diisambar ayaa xaafadaha Degmooyinka Gobolkaan Benaadir waxaa laga dhisay guddiyadii Ururka shaqaalaha ee heer xaafadeed, kuwaasoo ay xubno ka noqdeen jaallayaal tiradoodu gaarayso 1060 xubnood.

Xubnahaas guddiyada cusub waxaa loo furay tababar soconaayey muddo 4 beri ah oo lagu baraayey Barnaamijka iyo Xeerka Xiriirka guud ee ururrada shaqaalaha soomaaliyeed iyo hoggaaminta xisbiga ee ururrada bulshada. Waxaa kaloo halkaas laga bilaabay siyaasad Jaallenimo ee ururrada shaqaalaha degaanka. Degmooyinka Gobolka Benaadir intii deris ahba waa la mataaneeyey, mataantaasna waxaa laga bilaabay tababarka oo isku meel loogu qabtay.

Degmooyinka Xamar-Jajab Waaberi, XamarWeyne iyo Wadajir, waa la mataaneeyey, tababarkana waxaa loogu qabtay Hanuuninta Degmada Xamar-Jajab. Cabdulcasiis iyo Kaaraan iyo Shingaani, iyagana waa la mataaneeyey, tabbabarka waxaa loogu qabtay Golaha Hanuuninta degmada Cabdulcasiis. Boondheere, Yaaqshiid iyo Shibis waa la mataaneeyey, tababbarkana waxaa loogu qabtay Golaha Hanuuninta dadweynaha Degmada Boondheere. Degmooyinka H.Wadaag, Hodan, Waaberi iyo Dayniile iyagana waa la mataaneeyey tababarkana waxaa loogu qabtay degmada H. Wadaag.

# X.G.U.Sh.S iyo Ururrada Shaqàalâha Carbeed

Waxaa 19/12/77 ku soo laabtay dalka Jaalle Maxamuud Cali Axmed Guddoomiyaha Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed kana tirsan Golaha Dhexe ee Xisbiga HKS.

Jaalle Maxamuud iyo wafdiga uu hoggaaminayey waxay booqasho saaxiibtinimo ku tageen dalka Ciraaq horraantii bisha Diisembar, 77kii iyadoo uu casuumay Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha dalka Ciraaq.

Heshiiskaas oo qodobbadiisu dhigaayeen in ururrada Shaqaalaha ee labada dal isdhaafsadaan booqashooyin saaxiibtinimo iyo mid hawleed. Labada dhinacba waxay guddoonsadeen:-

— Inay wararka iyo Qoraallada iska kaalmaystaan.

— Inay iska casuumaan ciidda iyo shirweynayaasha mid kastaa qabto.

— In shaqaale Soomaaliyeed tababar u tagaan dalka Ciraaq.

— In ururka Shaqaalaha ee Ciraaq ka kaalmeeyo xiriirka Guud Ururrada shaqaalaha Soomaaliyeed hirgelinta Machadka Shaqaale ee laga hirgeliyo dalka Soomaaliyeed.

Waxaa iyaguna dalka ka ambabaxay wafdi kale oo ka socda xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed uuna hoggaaminaayey Jaalle Cabdullaahi Maxamed Mire oo ah Guddoomiye ku Xigeenka Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, isagoo u jeeda Dimishiq magaalo madaxda dalka Siiriya, si uu uga qayb galo shir xiriirka Dowliga ah

ee Ururrada shaqaalaha Carabta uga bilaabamaayey halkaas, 22kii Diisembar.

Shirka waxaa loogu tala galay in looga doodo arrimaha maamulka iyo danaha guud ee Ururrada Shaqaalaha Carabta.

Waxaa gegida dayuuradaha ku sii sagootiyey Jaalle Maxamuud Cali Axmed Guddoomiyaha Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed kana tirsan Golaha Dhexe ee XHKS Jaalle Cabdullaahi Maxamed Sheegow iyo xubno ka tirsan Xoghaynta Guud ee Ururrada.

Wararka kaloo naga soo gaaray Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed waxaa magaalada Xamar gegida dayuuradaha ka soo degay wafdi ka socda Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha ee Dalka Masar Maxamed Maxamuud Cabdiraxmaan oo ka tirsan Xoghaynta Guud ee Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha ee dalka Masar iyo Jaalle Cabbaas Maxamed Maxamuud Guddoomiyaha Ururka Macdanta, intii ay dalka joogeen waxay wafdigaasi wada hadalo la yeesheen madax ka tirsan Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha, wax wada qabsigooda, xoojinta iyo u halganka midnimada ururrada shaqaalaha Carabta. Dhammaan arrimaha laga wada hadlay waxay ku dhammaadeen isafgarad.

# Ururka Dhallinyarada Musaambiik (O.T.M) oo la Asaasay

Muddadii u dhexeysay 30kii Noofamber, ilaa 3dii Diisember 1977 ka waxa magaalada Mubuuto magaalo madaxda dalka Musambik lagu qabtay shirweynihii 1aad ee asaasidda ururka Dhallinyarada Musambik.

Shirweynahaas oo ay ka soo qayb galeen dhallinyaro ka kala socota dhammaan qaybaha bulshada ee dalkaas waxaa kale ee lagu marti qaaday oo ka soo qayb galay ururrada dhallinyarada ee dalalka horusocodka ah oo ay ka mid yihiin ururka dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed. Si shirweynahaas loo hirgeliyo waxaa la qabanqaabiyey shirar iyo kulanno kala geddisan oo loogu gogol xaarayo asaasidda dhismaha ururka dhallinyarada Musambik. Waxaa arrintaas door weyn ka ciyaarey dhallinyarada iyo dhammaan xoogagga horusocodka ah ee dalka Musambik waxay ugu dambayntii hirgeliyeen shirweynaha lagu asaasayo ururka dhallinyarada Musambik halkaas oo lagu sharciyeeyey xeerkii iyo barnaamijkii ururkaas laguna doortey guddiga fulinta.

Arintaasi waxay ka mid tahay guulaha waaweyn oo ay gareen dhallinyarada iyo shacbiga reer Musambik oo uu horseed u yahay xisbiga FRELIMO xisbigaasoo ah kii gaarsiiyey dalkaasi gobannimadiisa, kaddib markii uu muddo dheer halgan hubeysan kula jiray gumeysiga

Si ay iskaga daweeyaan dhaawacyadii uu gaarsiiyey gumeysigii ka talin jiray muddo 500 (Shan Boqol) oo sano ah dalkaasi, dadka reer Musaambik dagaalkoodii kuma ay joojin xornimada oo keliya ee waxay halkii ka sii wadeen halgankoodii ay ku gaarsiin lahaayeen dalkooda madaxbannaani dhinac kasta ah iyaga oo ka shidaal qaadanaya baaqii ahaa «Halganku waa socdaa « la lotta continua ».

Xisbiga FRELIMO oo horseed u ah halganka dadka reer Musambik waxa uu shirweynihiisii saddexaad oo dhacay April 1977 lagu guddoonsaday in jidka siyaasaddeed ee xisbigu raacayo uu yahay (Marxism - Leninism), si ay hore ugu mariyaan dhaqaalahooda una dhisan bulsho ka caafimaad qabta isku dulnoolaadka.

Dalka Musambik wuxuu leeyahay asaas dhaqaale ee beero iyo warshado ah (Agro - Industrial), sidaas darteed waxaa hubanti ah in uu degdeg hore ugu mari karo mabda'a Hantiwadaagga ah haddii xoogag horusocod ihi maamulka qabtaan;

Si arrintaas looga dhabeeyo waxaa lagama maarmaan noqotay in ururrada shaqaalaha; Dhallinyarada; Haweenka iyo indheer garatada la abaabulo si ay kaalintooda uga soo baxaan, una gutaan xilka ka saaran dhismaha dalkooda.

Ururka dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed isaga oo gudanaya waajibaadkiisa gudaha iyo dibedddaba waxaa uu xiriir iyo wax wada qabsi la leeyahay ururrada adduunweynaha horusocodka ah. si loo kala korodhsado waayo aragnimada dagaalka ummaduhu ay ugu jiraan madaxbannaani taam ah.

Taasi waxay keentay in aad loo qaddariyo kaalinta dhallinyarada Soomaaliyeed ay kaga jirto dhismaha bulshada Soomaaliyeed intii ka dambeysay Kacaanka curashadiisa. Guulaha muuqda ee dhallinyarada waxaa ka mid ahaa kaalintii ay dhallinyaradu kaga jirtey OHRM, Barnaamijka Dejinta iyo raridda, mashruuca bacaadcelinta iwm.

Dhallinyarada Soomaaliyeed iyo tan Musaambik oo labaduba dagaal hubaysan ku soo dhacsadey xorriyadoodii marna ka daali maayaan halganka ay ugu jiraan madaxbannaani taam ah.

## Arrimaha Dunida

# Xaaladda Soomaali Galbeed iyo Xeerka Madaxbannaanida Wadammada ee lagu Sharciyeeyey Qawaaniinta U.M.A

C. M. Cabuud

Inta aan la galin dulcada xaalkan isaga ah waxa habboon in la sheego qodobbada taariikhiga ah ee muhiimka ah ee la xidhiidha su, aashan; si aynnu u qayaxno utunta mushkiladda Soomaali Galbeed.

Waa run cad oo la wada ogyahay in dhammaadkii qarnigii sagaal iyo tobnaad ay waddammada reer Yururb Afrika kala qaybsadeen. Soomaaliya waxay ahayd dalka Afrikaanka ah ee ugu nebcaa dhibaatooyinka uu la yimid qaybqaybsigaasi. Dadka Soomaaliyeed oo ah dad isku mid ahaanshadoodu aad u sarreyso, Af qudha ku hadla, diin keliya wada haysta, dhaqan iyo caadooyin isku mid ah wadaaga, ayaa markii ugu horraysay arkay iyaga oo la qaybqaybiyay oo la hoos dhigay saddex gumayste: Ingiriis, Fransiiska iyo Talyaaniga.

Gumaystayaashu waxa ay ula kac ahaan degmada ay qaybsadeen ku xeereen xuduudo beenbeen ah oo loola dan lahaa inay daryeelaan danaha iyo ujeeddooyinka isticmaarka.

Itoobiya waxa ay markaasi ka mid ahayd dalalka aad u yar ee madaxbannaanaa. Si ay u rumayso damaceeda dhulballaadhsiga ah waxay qaybsatay qayb ka mid ah dhulka Soomaaliyeed, si aan waxba kaga duwanayn dawladihii kale ee wax gumeysanayey.

Mudane Bevin oo ahaa Xoghayaha Arrimaha Dibedda ee Ingiriisku wuxuu ka caddeeyay guriga duqayda 1946kii «qarnigan qaybtiisii danbe waxa Geeska Afrika loo kala qaybiyay Ingiriiska, Fransiiska, iyo Talyaaniga. Muddadii aanu degnay qaybtayada, xabashidu waxa ay qabsadeen badh gudaha ah oo daaqsin u ah in ku dhow badh ka mid ah reer guuraaga degan Waqooyiga Soomaaliya».

1954kii waxay Itoobiya qabsatay intii ka hadhsanayd Soomaali-Galbeed (bedka seeran iyo Hawd) iyaga oo cuskanaaya heshiiskii Ingiriiska iyo xabashida ee 1954kii. Inkastoo Gobolladii kale ee Soomaalidu ay hanteen Gobannimo madaxbannaan, xabashidu weli way haysataa Soomaali-Galbeed waxayna u diiddan tahay inay aayahooda ka taliyaan.

Dadka Soomaaliyeed ee halkaasi ku nooli ma jirto wax ay la wadaagaan dadka xabashida ah. Arrintaasi waxa qoraal ka bixisay Marwada la yidhaa Beerhaam, «Waxa jira kala gaddisnaan fara badan, dad ahaan iyo qaab ahaanba oo lagu kala qaybin karo gobolladan. Faraqa diintu waa mid sii xoogaynaaya Faraqyada kale ee waligoodba Itoobiya ka hortaagnaa in ay gobolladaas ka dhigto dhul ay leedahay. Ma aha uun dhul uu islaamku kaga xoog weynaaday masiixiyadda Itoobiya, ee waa dhul xataa ka hooseeyaa buuraheeda dhaadheer» (Beerahaam, Dawldda Itoobiya, 1948).

U.M.A. waa urur saldhigaasu gobolaysi yahay oo ku abuurmay heshiiskiisu Adis-Ababa lagu guddoomiyay 23dii May 1963kii. Qodobka saddexaad ee xeerka UMA wuxuu caddaynayaa sharciyada ay dalalka ka mid ah ururkani ay ku ballanqaadeen in ay ku dhaqmaas.

Shiba qodob-yaraha saddexaadi wuxuu sheegayaa: «In la tixgaliyo madaxbanaanida iyo sharafta xuduudada ee dal kasta iyo xaqa aan lagu gudbi karin ee u leeyahay jiritaan xor ah».

Arrintaa ku saabsan dhowridda xuduudaha waxa kale oo lagu soo qaaday shirkii madaxweynayaasha ee caadiga ahaa laguna qabtay Qaahira 17-21 Juulay 1964kii oo lagu guddoomay go'aankan. Iyada oo la tixgelinaayo in mashaakilka xuduudaha ay dhaliyaan iska horimaad khatar ah, joogtana ah, iyada oo la ogyahay in ay jiraan dhaqdhaqaaqyo Afrika ka baxsan oo ulajeeddadoodu ay tahay inay qayb-qaybiyaan dalalka Afrika iyada oo waliba la jiirinaayo in xuduudaha dalalka Afrika laga soo qaado maalintii ay xoroobeen ay yihiin kuwa jira oo la taaban karo, iyada oo la xusuusanyahay in kalfadhigii labaad la sameeyey Guddi ka kooban kow iyo toban oo loo xilsaaray inay darsaan tallaabooyin lagu xoojinaayo isu-tagga Afrika.

Iyada oo la aqoonsanyahay baahida lagama maarmaanka ah ee loo qabo in si nabadgalya ah oo Afrikaanimo ah loo xalliyo khilaafyada ka dhexeeya waddammada Afrikaan ah.

Iyada oo waliba la xusaayo in dalalka ururku ay ballan qaadeen,

qodobka 6 ee xeerka midowga Afrika, inay ixtiraamaan dhamaan sharciyada ku xusan maqraha 3aad ee qodobka 3 ee Xeerka Ururka Midowka Afrika.

1. Mar labaad waxa si sharaf leh loo sheegayaa dalalka in ururku ay ku dheggenaadaan ixtiraamka sharciyada ku xusan maqraha saddexaad Qodobka Saddexaad ee Xeerka UMA.

2. Waxa si sharaf leh loc caddayneyaa in dhammaan dalalka ururku ay ballan ku qaadeen inay ixtiraamaan soohdimihii jiray markii ay xoroobeen.

Iyada oo aynu gogol dhig ka dhiganayno intaas, waxa aynu hadda dayaynaa in aynu lafagur sharci ah ku sameyno xaaladdan taas oo ah in anu eegno ixtiraamka xeerka madaxbannaanida dalalka» ee ku xusan qodobka saddexaad ee qaynuunka UMA mar labaad na lagu sheegay go'aankii Lam 16 (1) lagu dhaqi karo xaaladda Soomaali-Galbeed.

Itoobiya waxa ay ku dheggan tahay malo ah in Soomaaliya ay tahay dalka qudha ee xiisaynaaya arrintan, sidaa awgeed waxay Itoobiya fidisaa dicaayadda «damaca dhulballaadhsiga Soomaaliya ee lagu abuuraayo Soomaali weyn». Marka ay sidaa falanayso Itoobiya waxay maaggan tahay (1) In xaalka ay ka dhigto arrin fudud oo soohdimeed oo dhextaala laba dal oo ku jira UMA sidaa awgeed ay hawl yar tahay in Soomaaliya la dareensiiyo in aanay qaddarin xeerarka iyo qawaaniinta ay saxiixday ee u yaalla UMA.

2. Ina ay ka leexiso indhaha dunida runta iyo xaqiiqada oo ah in ay xukumayso dad aan keeda ahayn oo laga horjoogo in ay ka taliyaan aayahooda.

Gabagada kor ku xusani waxa kale oy jawaab cad u noqon kartaa go'aankii 16 (1) ee UMA. Go'aankii waxa loo guddoomiyay si looga dhigo wax cad oo la taaban karo arrimo mar hore lagaga hadlay Qodobka 3 ee Xeerka U.M.A. sidaa darteed ma jiro wax cusub oo uu ku soo kordhiyay arrinta laga hadlaayey.

Bal haddana aynu jirino xaaladdan «Marka aynnu ka eegno dhinaca sharciga Itoobiya ma codsan kartaa in la ixtiraamo sharfta iyo madaxbanaanida dhulkeeda?».

Si aynu uga bixinno jawaab tifaftiran su'aashan, waxa lagama maarmaan ah in aynu bal marka hore eegno, haddiiba uu jiro sababaha ay ku dacwiyayso Itoobiya in ay dhulkaas iyadu leedahay.

Labada xaalo ee laga yaabo in Itoobiya ay ku xalaashato haysashada Soomaali-Galbeed waxa weeye:-

1) Inay ku andacooto in dhulkaasi ka mid ahaan jiray Itoobiya waligiiba; ama

2) Inay ku andacooto in soohdimaha hadda u yaalla Itoobiya lagu xusay heshiisyo caalami ah.

Taariikhdu waxay si aan shaki ku jirin u caddaynaysaa muddadii ka horreysay kala qaybqaybintii Afrika, in Soomaalida Galbeed aanay ka mid ahayn waddanka xabashida.

«Ilaa 1880, halka ugu konfuraysa Itoobiya waxba kamay badnay 100 mayl meel u jirta Addis-Ababa». «Laakiin hubkii cusbaa ee faraha badnaa ee lagu soo dejiyay Fransiiska iyo Talyaaniga ayaa siiyay boqorka Shawa, oo markii danbe noqday imbraadoor, fursad uu ku ballaadhsado dhulkiisa (Berhaam, the boot of Ethiopia Bogga 293-4) waxa kale oy Beerham tidhi «Tartankii cusbaa ee dawladaha waaweyn ee reer Yurub ay keeneen Afrika, iyo maamulkoodii ku dhisnaa in la xukumo xuduud qiyaasan, ayaa ku dhalisay Mililig inuu qayto Imbraadooriyad uu isagu leeyahay khaas ahaan markuu kaga adkaaday Talyaaniga dagaalkii» Adowa 1890kii, ayuu u diray Janaraaladiisii guulaystay hawshan oo uu mar horeba bilaabay isagoo damacsanaa inuu u riixo soohdimaha Itoobiya Koonfur iyo Bari, inta aanay uga soo horrayn reer Yurubkii uu la tartamaayay (Beerhaam, OP. Cit, Bogga 61).

Mistar Smiidh, A.D. socdaalkii sii 100 mayl meel waqooyi ka xigta bad yarta loo yaqaan Rudhulf, wuxuu kula kulmay 1895kii, dad la «Mela» oo aan waligood maqlin erayga kaffa iyo jiritaanka Abasiinaya. Wuxuu hadal ku dhammeeyey «U malayn maayo inay Kaffa xagga Koonfureed waxba ka jirto Abasiiniya ama inay Abasiiniya ay deggen tahay dhulka ka hooseeya Bariga». (Smiidh, A.D. Through unknown African Countries, 1897, Bogga 319).

Waxa laga garan karaa hadallada kor ku xusan sida aanay sal iyo baar midna u lahayn muranka ah in Itoobiya ay waligeedba lahaan jirtay dhulkaas, inkasta oo Mililig isagoo taariikhda ka beensheegaya uu yidhaahdo xuduudadaydii hore».

Lamma aqbali karo in soohdimaha Itoobiya, marka laga hadlaayo Soomaali Galbeed, lagu sugay heshiisyo caalami.

Mucaahadooyinka dawladihii Isticmaarkii ay ku siiyeen Itoobiya dhulka Soomaalida ma laha raad sharci ah, maxaa yeeley Ingriiska iyo Talyaanigu waxay ahaayeen dalal, ilaaliyaal ah, awoodna uma lahayn (madaxbannaani) ay ku jiraan dhulka muranku ka joogo, iyada oo la raacaayo Xeerka: «Nemo Plus juris in aluim transfere potest quam ipse habet.»

Inkasta oo magaca Itoobiya lagu hirgaliyey heshiisyadii 1877kii iyo 1908kii, haddana si run ah uma qabsamin Itoobiya dhulkaas, waxaa intaa dheer, ma waafaqsana heshiisyadaasi qawaaniinta caalamiga ah ee cusub ee odhanaaya

waa in heshiisku oggol yahay xuquuqda dadka laga hadlaayo ay u leeyihiin in ay ka taliyaan aayahooda. Taas oo loo baahanyahay in ay Itoobiya ixtiraanto mar haddii ay ka mid tahay Qarammada Midoobay.

Waxa si cad qodobbadaas kore uga muuqda, in haysashada ay Itoobiya sii haysato Soomaali Galbeed aanay lahayn wax cudur daar ah, oo aasaas leh ama nidaam ku dhisan. Mar haddii ay ka maqan tahay sharci taageerayaa haysashada Itoobiya ay dhulkan ku haysata waa mid xaaraan ah oo aan xaq ahayn.

Sidaa awgeed Itoobiya ma cuskan karto ixtiraamka xeerka «dhawrista sharafta soohdimaha Qarameed», marka ay ka hadlayso Soomaali Galbeed. Maxaa yeelaya ma haysato wax sharci ah oo ay ku xukunto.

# Lama Huraanimada Burburka Midabtakoorka

Boobe




Tammuuxaa ka badan inta gees madow taliska Vorster silic xabsiyadu ugu dilay ama gu'yaal ku seetaysnaa xabsiyada darxumada loogu abaaday sida «Robin Island». Steve Biko ma ahayn halyaygii ugu horreeyey ee Booliska Vorster xabsiga ku silic dilay, waana hubaal inaanu noqon kii ugu danbeeyey inta tirayarta caddaanka ihi Koonfur Afrika ka amarku-taaglaynayso madowguna hubka u qaatay inuu seetada gumaysiga iska gooyo.

Shaki kuma jiro in halgankii ugu qadhaadhaa adduunyadan aan ku noolnahay uu ka socdo Koonfur Afrika. Halgankaasi wuxuu dardar hor leh la yimid waayadan danbe markii ay xoroobeen dalakii Afrika ee Boortaqiisku gumaysanayay kuwaasoo balaayo xijaab u ahaa talisyada Vorster iyo Ian Smith. Waxaynu maanta marag ka nahay isbeddellada lama huraanka ah ee ka socda Koonfurta Afrika. Maxaa isbeddelladaa keenay? Sababuhu way badanyihiin, waxaynu se soo qaban karnaa dhow arrimood:

1. Xoogagga horusocodka ah ee adduunka gaar ahaanna Afrika oo xoogaysatay ka dib markii ay xorbeen dalakii Boortuqiisku uu gumaysanayay halkaana ay ka dhasheen dawlado horusocod ah oo aad isugu hawlay xoraynta Simbabwe iyo Koonfur Afrika.

.2 Dawladaha reer Galbeedka oo aqoonsaday jabka ku soo fool leh talisyada caddaanka tirada yar, sidaa darteedna isku deyaya inay wax ka beddelaan qaabka siyaasadeed ee dalalka, iyagoo ku dadaalaya inay ka dhisaan dawlado madowoo maqaar saar ah, iyagoon marnaba rabin inay lumiyaan danahooda monobooliga ah, isla markaana ay badbaadiyaan tirayarta cad ee dalkaa ku dhaqan.

3. Halgankii dadyowga tirayartu gumaysto oo heer and u sarreeya gaadhay, garaadkii dadwaynahana u bisheeyay halgan kama dambays ah.

4. Midabtakoorka oo buro ku noqday xilligan maanta la marayo, adduunweynuhuna badiba garawsaday lama huraannimmada burburikiisa.

Haddaynu intaa ku dhaafno waxyaabaha curiyay isbeddelka iyo halganka ka socda koonfurta Afrika, waxaynu arkaynnaa in kicitaankii Ardayda soweto ee 16kii juun, 1976kii, intii ka danbaysay dilka, xabsiga iyo masaafurinta cidl bax u noqdeen taliskii vorster ee wadku ku soo dhawaaday.

Kicitaankii Ardayda ee Soweto Juun 16dii, 1976kii waxa ka danbeeyay dhaqdhaqaaqa «Black consciousness», ee uu hoggaaminayay Steve Biko. Ardayda Soweto Biko, wuxuu u ahaa maskaxda Idiyoolajiyadeed ee kacaankooda. Biko wuxuu ka mid ahaa madaxdii madoobayd ee ugu horraystiiba la xidhay kicitaankii Soweto ka dib iyadoo aan maxakamad la soo jocjin.

Lixdannadii Steve Biko wuxuu madax ka ahaa Ururka ardayda Madow ee Koonfur Afrika (SASO) oo aan ku dheehin «dareenka Modoobi Biko uma ahayn midabsiiyay madow oo dhan. «Dareenka Modoobi Biko uma ahayn midobtakoor madow balse wuxuu u ahaa ku soo noolaynta aqoonsiga madow bulsho inkiraysa jiritaanka aqoonsigaas. Ururka Ardayda da Madow ee Koonfur Afrika (SASO) oo Biko madax ka ahaa wuxuu suurageliyey kulankii iyo midayntii 70 Urur oo dadka madoobi lahaayeen, Steve Bikona maamuus ahaan

Madaxweyne u ahaa ilaa intuu ka dhimanayey .

Dhagar kama waantocbc taliska vorster e, sannadkan oo keliya waxa xabsiyada ku dhintay 22 ka mid ah maxaabiista siyaasadda ee madow kuna xidhnaa xabsiyada koonfur Afrika. Madaxdaa madoobi waxay u dhinteen nabarridii ku gaadhay silic-dilka booliska Vorster taliska peretoria se wuxuu ku tiraabaa inay ku dhinteen si «Dabiici» ah ama «Cuntada oo ay ka soomeen».

Steve Biko, oo soddon jir ahaa madaxna ka ahaa dhaqdhaqaaqa «Black Consciousness» ayaa ka mid ahaa madaxda madow ee lagu silic-dilay xabsiyada koonfur Afrika.

Biko waxa la qabtay bishii Agoosto 1977ka. Waxa loo taxaabay xabsi ku yaal Port Elizebeth oo 800Km u jirta Pretoria. Saddex toddobaad markuu xidhnaa ayaa boolisku dilay iyagoo ka doonaya inay war ka helaan ku saabsan dhaqdhaqaaqyada madow. Biko halkaa nabar xun ayaa madaxa ka gaadhay oo ka soomiyay oontii booliiskuna dan kama g e l i n, lamana tusin takhtar ku sheegyada xabsiyada j o o g o . Habeen badh ayaa Biko gaadhi «Landrover» ah dushiisa la soo saaray isagoo qaawan oo la keenay magaalada pretaria hase yeeshee halkii ayuu maalintii danbaba Sebtembar geeriyooday. Steve Biko waxa lagu aasay magaaladiisii, King William, waxaana ka qayb galay aaskaa halyayga, 20,000 oo qof.

Qaylada ayaa dalluuntay oo dalka gudihiisa iyo dibeddaba waa lagaga kacay taliska Vorster. Dhaqdhaqaaqyadii, ururradii iyo wargeysyadii dadka madow ee Koonfur Afrika lahaayeen ayaa kacay iyagoo canbaaraynaya kadeedka iyo cadaadiska midobtakoorku ku haya. Adduunyadoo idil ufo iyo dabayl caanbaarayn ah ayaa kaga soo fatahday taliska Vorster. Isagoo foof habaabinaaya ra'yal caamka adduunka taliska pretoria wuxuu qabanqaabiyay maxkamada lagu baadhayo dhimashadii Stevo Biko Saddex toddobaad ayay maxkamaddu socotay, ugu danbayntiina garsoorihii wuxuu sheegay in Biko u dhintay nabar Madaxa ka gaadhay mar uu la dagaallamayay Booliiska. Go'aankaasi naxdin kuma ridin dadyowga madow ee Koonfur Afrika iyo dadyowga sinnaanta u halgamaya ee adduunka, waayo way ogaayeen inaan dhawaaq sami ka soo yeedhayn budhcadda koonfur Afrika.

Dilkii Biko wuxuu criyey mowjado bannaanbaxyo ah oo lagu gilgilay udubahexaadyadii midabtakoorka, dalka gudihiisa iyo dibeddana laga qabanqaabiyay. Bannaanbaxyadaasi oo abbaaray foolxumada, aadaminimo-xummada iyo bahalnimada midabtakoorku, waxay dhaliyeen in taliska Pretoria xidho 60 ka mid ah hoggaamiyayaasha ururrada dadka madow, albaabbada loo xidho 19 urur oo ay lahaayeen dadka madoobi waxaana la mamnuucay laba wargeys (The World and the Weekend world) oo aad uga hadli jirey danaha dadka madow lidna ku ahaa Taliska Pretoriya.

Tirayarta cad ee Koonfur Afrika oo haatan dareentay sare u kaca waddaninnimada dadka madow maragna ay ka tahay doorashooyinkii Koonfur Afrika oo la soo hormariyay, maadaama dareenkii madowgu aad kor ugu kacay, taliska Vorsterna rabo inuu sii adkeeyo siyaasaddiisa faquuqa ah.

Faallaadhi gilgilasho kaagama go'do, taliska Pretoriana ku joojin maayo halganka ka socda Koonfur Afrika dil, xabsi iyo iyagoo irridahau xidha ururrada ka soo horjeeda siyaasadda midabtakoorka ah. Koonfur Afrika waa dal ka mid ah Afrika waxaana iska leh dadka madow ee dalkaa u dhashay. Cadaadiska iyo kadeedka dadkaa madow lagu hayaa waa mid sii lisaya halgankooda una soofeynaya inay qoriga u qaataan halganka kama danabaysta ah ee ay iskaga tuurayaan heeryada taliska midabtakoorka ah ee Pretoria. Ku samaynayo gobollda: Transkei, Bantustan iyo kuwa la midka ihi xal u noqon maayaan diidmada gumaysiga iyo midabtakoorka ee dadyowga madoobi ugu jiraan inay xuquuqdooda ku hantiyaan.

## Warbixinta Bisha

# JAALLE SIYAAD oo Booqday Madagaskar



Madaxweynaha JDS, J/Le Maxamed Siyaad Barre iyo wafdi heer sare ah oo uu hoggaamnayey oo ay ku jireen xubno ka tirsan Golaha Dhex ee XHKS, ayaa dhammaadkii Disambar booqasho maalin ah oo rasmi ah ku tegey Jamhuuriyadda Malgasi. Booqashadaas, waxa Jaalle Siyaad ku martiqaaday madaxweynaha Jamhuuriyadda Malgaasi Mr. Didier Ratsirak.

Labada madaxweyne waxay falanqeeyeen, xaaladda Geeska Afrika, xidhiidhka labada geesood, iyo arrimaha adduunka.

Madaxweyne Siyaad oo ragga wararka u warramayey wuxu shaaca ka qaaday in kulan gaar ah oo uu la yeeshay Madaxweynaha Malgaasi, Mr. Ratsiraa, ka, kuna saabsanaa sidii nabadda loogu dhammayn lahaa dhibaatada Geeska Afrika, uu ku faahfaahiyey siyaabaha nabadda runta ahi ay ugu soo noqon karayso Geeska, iyadoo arrintaas ay shisheeye soo dhexgaleen lana mocdo in meesha uu ka maqan yahay wax ka qabad Afrikaannimo, oo ay ahayd inay u horseedaan madaxda dalalka Afrika.

Xoghayaha Guud ee XHKS, Jaalle Siyaad wuxuu tilmaamay inuu u soo bandhigay Madaxweyne Ratsiraka hindisaha JDS waxana uu ku dhawaaqay in Soomaaliya ay si buuxda u taageerayso xal Afrikaan oo lagu dhammeeyo, dhibaatada Geeska Afrika.

«Kama soo horjeedno waxqabadkii caddaalad ku dhisan ee dani ugu jirto, dadyowga arrintaasi khusayso», ayuu yidhi Jaalle Siyaad.


# Ardaydii ka Qalinjebisey Kulliyadda Caafimaadka

17kii arday ee ugu horreeyey ayaa badhtamihii Disambar ka qalin jebiyey Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Ummadda tan iyo intii Kulliyaddaa la aasaasay 1973kii. Dhakhtarradaa cusubi waxay kaloo ahaayeen koox dii u horreysey ee cilmiga dawada dalka loogu tababaro. Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre ayaa ka qayb galay Xafladdii Qalin jebinta, isagaana dhakhtarrada shahaadaha u qaybiyey.

Hadal ayuu halkaa ka jeediyey Madaxweynuhu wuxuuna u mahadnaqay barayaasha talyaaniga iyo dawladdooda oo suuragal ka dhigay aasaasidda Kulliyadaas. Waxaanu sheegay sida uu ugu bogey qaybta ay ka qaateen xaqiijinta ujeeddooyinka kacaanka oo ay ka mid ahayd aasaasidda Jaamicad Qaran. Wuxu yidhi Jaalle Siyaad, «Dad badan ayaa wax lagu qoslo ay la ahayd, in dalkan Jaamacad laga sameeyo, hase yeeshee midheheeda waa taa aynu maantaha arkaynaa». Wuxu Madaxweynuhu si tifaftiran uga hadlay guusha ay gaadheen ardada ka soo baxday Kulliyadda dalka iyo dhibaha ay la kulmaan ardada waxbashada Jaamacadeed ku qaata dibaddu.

«Ujeeddada weyn ee aannu ka lahayn Jaamacad laga aasaaso Soomaaliya ma ahayn oo keliya soo saaridda dad wax bartay oo indhuhu u furan yihiin ee waxaannu kaloo dhisayney, arday waddaniyiin ah oo dalka danihiisa u hoggaamiya,» ayuu ku nuuxnuuxsaday, Jaalle Siyaad.

Waxa kaloo Madaxweynuhu ka warramay. xaaladda dalka ee imminka iyo kaalinta dhakhtarrada cusubi ay kaga beegnayaan. Hantiwadaagga isagoo ka hadlaya Jaalle Siyaad wuxu ku tilmaamay hab Bulsho-dhaqaa- iyo waayihiisa gaar ahaaneed. Wuxu ku dhawaaqay Madaxweynuhu in Soomaaliya ay weligeed taageeri jirtey, imminkana taageerayso ururrada Gobannimadoonka ah ee Afrika iyo Aasiya, ayna mar walba ka soo gumeystaa waxa uu bilaabmay markii dadkaa loo oggolaan waayey in hab nabadeed ay xuquuqdooda iyo gobannimadooda ku helaan». Xidhiidhka Soomaaliya iyo Kiinya, Jaalle Siyaad wuxu ka sheegay in J.D.S. ay




le oo uu dal kastaa u qaadan karo horumarkiisa, waana ta Soomaaliya ay u qaadatay ayuu yidhi. Xoghayaha Guud ee XHKS, waxa dadka jahaweerka geliya Aydoolojiyada Hantiwadaagga uu ku tilmaamay, maangaab, waxana uu sheegay inuu yahay hub dal kastaa uu qaadan karo isagoo eegaya kuwa beegaya dhaqankiisa, hiddihiisa, horjeeddo gumeysiga nooc kasta ha noqdee. «Gumeystayaashu ma gartaan raadxumada waxyaabaha ay ku kacayaan ilaa ay dalka la gumeystaa kacaan oo la dagaallamaan», ayuu yidhi madaxweynuhu, wuxuuna raaciyey «Halganka bubaysan ee gumeysiga Addis-ababa ay kula jiraan dadka Soomaaliyeed iyo Eriteriya ee uu dalkooda aaminsan tahay in si walaalnimo iyo Afrikaannimo ku jirto loo dhammayn karo, mushkiladda labada dal dhextaal.

Ugu dambayntii Jaalle Siyaad wuxu ugu baaqay dadka Soomaaliyeed inay feejignaadaan oo isku duubnaadaan si ay madaxbannaanidooda u dhawraan dalkoodana ay horumar gaadhsiiyaan.

# Sannadguuradii 34aad ee Booliska Soomaaliyeed





Sannad walba 20 ka Diisambar waxa dalkeenna laga xusaa sannadguurada Boliiska. Sannadguuradii 34aad ee sannadkan xuskii lagu maamuusayey oo ka dhacay dugsiga Booliska ee Muqdisho' waxa ka qaybgalay Xoghayahay Guud ee XHKS, madaxweynaha J.D.S. Jaalle Maxamed Siyaad Barre, waxana goobjoog ka ahaa Madaxweyne ku xigeennada J.D.S.Jaalle S/Gaas

Xuseen Kulmiye Afrax iyo Jaalle Ismaaciil Cali Abokor, guddida siyaasadda ee Xisbiga, madax ka tirsan golaha Dhexe, saraakiil ka tirsan Ciidammada iyo xubno ka socday ururada bulshada. Xuskaa waxa riwaayado iyo googoosyo tilmaamaya halgankii dheeraa ee gobannimodoonka ku soo bandhigay kooxaha Heegan iyo Horseed. Khudbad uu munaasabaddaa ka jeediyey Jaalle Siyaad wuxuu ku bogaadiyey isagoo ka wakiil ah dawladda iyo Xisbiga, Ciidammada Booliska iyo Qoysaskooda, oo uu u rajeeyey in sannadka 1978ka ay guul ka gaadhaan daafacaadda iyo ilaalinta badbaadada qaranka. Wuxu yidhi madaxweynuhu «Tan iyo intii la aasaasay 1943-kii ciidanka boliisku wuxuu soo maray heerar kala duwan, kaalin xoog lehna wuxuu ka qaatay dagaalkii ummaddu u soo martay gobannimada, shakina kuma jiro in hawlaha boolisku ay soo qabteen ay baal dahab ah ka geli doonaan taariikhda ummadda.»

Jaalle Siyaad wuxu ku dhawaaqay in booliisku yahay xoog waddani ah oo himiilooyinka aynu u halgamayno run iyo xaqiiqo u tarjumaya. Wuxu intaa raaciyey in boolisku kaalin weyn ay ka qaataan sida mabaadii'da hantiwadaagga loogu faafinayo dadka, sida kor loogu qaadayo garaadkooda siyaasiga ah iyo waliba ilaalinta hantida dadweynaha.

Taliyaha ciidanka booliska Soomaaliyeed Jaalle S/Guuto Cabdullaahi Maxamuud Xasan, oo ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS. ayaa isna munaasabaddaa hadal ka jeediyey waxaanu yidhi 34kii sano ee ciidanka boolisku dhisnaa wuxu kaalin laxaad leh ka galay hawlaha dhismaha dalka, ilaalinta nabadgelyada iyo dhawridda caddaaladda».

Jaalle Cabdullaahi wuxu ku nuuxnuuxsaday in Boolisku kasoo baxay waajibaadkiisii waddaniga ahaa oo dhan, dadka Soomaaliyeedna ay fahmeen kaalinta Boolisku kaga jiro ilaalinta badbaadada dadka iyo madaxbannaanida Qaranka, diyaarna u yihiin inay Boolisku ku taageeraan fulinta hawlahooda.

# JDS Hadalkii ay ka soo Saartay B. Dexe

Nin u hadlay Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee JDS, waxa uu soo saaray 14kii Diisamber, bayaan dalalka Carabta ugu baaqaya in tamartooda ay mideeyaan si ay uga gudbaan dhibaha maanta taagan iyo kuwa soo socda.

Ninkaasi waxa uu sheegay in xidhiidhka dawladaha Carabtu xumaaday oo gaadhay heer dhiillo dhalin kara, taasoo halis gelinaysa is-garabsigooda iyo awooddooda. Waxa uu yidhi; Ummadda Carabtu, isbahaysi iyo midnimo xoog leh ayay u baahan tahay si ay wax uga qabato, khilaafka ka jira ee taabanaya, daneheeda iyo jiritaankeeda. Waxa kaloo ninkaasi uu tilmaamay baahida loo qabo adkaysi iyo dulqaad si loo dhammeeyo khilaafka taagan, waxana uu raaciyey in dulqaadkaa la'aantii, ay dhalan karaan arrimo khatar ah oo raad xun ka reebi kara himilada dadyowga Carabta ah ee ah inay soo ceshadaan xaqa ay u leeyihiin dhulkooda la haysto inay xoreeyaan.

Ninkaas u hadlay Wasaaradda Arrimaha Dibaddu waxa uu ku dhawaaqay in JDS ay ugu baaqayso walaaleheeda Carbeed inay dulqaad yeeshaan oo ay awdaan khilaafaatka dhexyaal, ee cadawga mooyee cid kale aan faa'iido ugu jirin.

# Socdaalkii Jaalle Kulmiye ee Yurubta Galbeed



**Wafdi sare oo uu hoggaaminayey madaxweyne ku xigeenka JDS Jaalle S-Gaas Xuseen Kulmiye Afrax ahna Kaaliyaha Madaxweynaha xagga arrimaha Madaxtooyada, ayaa bishan horraanteeda soo gebagebeeyey socodaal ay ku soo mareen dhawr dal oo ka tirsan Yurubta Galbeed. Waxa Jaalle Kulmiye uu soo maray dalalka Ingiriiska, Faransiiska, Jarmalka Galbeed iyo Talyaaniga, isagoo wadahadallo la yeeshay Madaxda dalalkaas isla markaana gaadhsiiyey**

dhambaallo uu ka siday Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

Wafdigaas Jaalle Kulmiye waxa ka mid ahaa Wasiirka Arrimaha dibadda ee dalka Soomaaliya Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Barre iyo guddoomiyaha Qorshaha Qaranka Jaalle Axmed Xabiib Axmed.

Markii uu dalka ku soo noqday isagoo ragga wararka faafiya uu warramaya, Jaalle Kulmiye waxa uu sheegay in wadahadalladii uu la yeeshay James Callahan (Guddoomiyaha Golaha Wasaaradda Ingiriiska), Valary Giskard D'estang (Madaxweynaha Faransiiska), Helmut Sehmidt (Guddoomiyaha Golaha Wasaaradda Jarmalka Galbeed) iyo Giulio Androti (Guddoomiyaha Golaha Wasaaradda Talyaanigu) ay guul ku dhammaadeen, kuna saabsanaayeen xoojinta xidhiidhka iyo iskaashiga dhaqaale ee JDS iyo dalalkaasi.

Jaalle Kulmiye iyo wafdigiisu markii ay soo noqdeen waxa si diirran ugu soo dhoweeyey gegida diyaaradaha ee Magaaladan Mugdisho Madaxweyne ku Xigeenka JDS ahna Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle S-Guuto Ismaaciil Cali Abokar, Guddoomiyayaal, Loggaamo, Wasiirro iyo madax kale.

# Wasiirka Cusub ee Maaliyadda



Fadhi ay dhawaan yeesheen Guddida Siyaasadda ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, waxa lagu magacaabay Jaalle Maxamed Yuusuf Weyrax inuu noqdo Wasiirka Maaliyadda, ka dibna waxa xilka loogu hor dhaariyey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

Khudbad gaaban oo uu munaasabaddaa ka jeediyey, Madaxweynuhu wuxuu u rajeeyey Wasiirka guul inuu ka keeno, jagadaa loo magacaabay iyo culayska ay leedahay.

«Waxa laguu saaray xilkaa culus inaad si daacad ah ugu adeegto qarankaaga, waxan kuu rajeenayaa inaad ka soo dhalaasho», ayuu ku adkeeyey Madaxweynuhu.

# STEVE BIKO

Dhiiggii Afrikankii uu gumaaday xukunka argagixiska ah ee Koonfur Afrika, isagoo weli ka sii qoyan suuqyada magaalada Soweeto, oo xuddun u ahayd dhiidhiga dadka madoobi ay ku diiddan yihiin midab kala sooca (Appartheid), ayay soo yeeshay geeridii Stiif Biiko, oo ahaa hoggaamiyaha dhaqdhaqaaqa Qareenka dadka madow, madaxna u ahaa ururka ardayda. Biiko oo 30 jir ahaa, Xabsigana ku geeriyoodey, Bishii Ogoosto 18dii ayaa lagu qabtay agagaarka magaalada Garehns town ee Koonrur Afrika iyadoo loogu marmarsooday Qaanuunka argagixisnimada, oo «argagixisnimo» ku tilmaama ka soo horjeedka midabtakoorka. Iyadoo la xukumin ayaa lagu ridey xabsiga «port Elizabeth». 11kii Sebtambar ayaa loo soo wareejiyey xabsiga dhaxe ee Pirtooriya, maalintii labaadna isagoo meyd ah ayaa loogu tegey qolkii lagu ridey. Stiif Biiko wuxu wax ka asaasay: Dhaqdhaqaaqa Qareenka dadka madow,» wuxuuna majaraha u qabtay la dagaallanka midab kala sooca. Ugumu horreyn Biiko maxbuus Afrikan ah Xabsiga ku qudhbaxa. 18kii bilood ugu dambeeyey ugu yaraan 22 ayaa jeelasha ku geeriyoodey. Jaraa'idka Afrikankuna waxay ka warrameen maxaabiis badan oo Afrikan ah oo geeridoodii midabtakoorku ay ku fasireen in daaqadihii xabsiga iska tuureen ama musqusha saabuun ku sinbiriirixdeen dabeedna qoorta ka jabeen iyo siyaabo kale oon caqligal ahayn. Waxa kaloo wargeysyada tilmaameen geeridii hoggaamiyihii ururkii xoraynta Koonfur Afrika ee la xaaraantimeeyey, Albert Luthuli, oo Abaalgudka Noobal ee nabadda helay, dhawr sano ka

horna tareen, «siyaabo aan la garanayn» uu u jiidhay.

Geerida Biiko shaki iyo tuhun gocni ah ayay dhalisay. Taliska midabtakoorku wuxuu markii hore u aaneeyey lix maalmood oo ay yidhaahdeen cuntada ayuu ka soomay, hase yeeshee caafimaadka Biiko (oo miisaankiisu laba boqol oo rodol ahaa dhererkiisuna lix fuut ahaa) ma ahayn mid nafaqadaro sidaa degdegga ah wax uga qaaddo.

Biikoo waxa uu ahaa nin miyir u socod ah, caddaan badanina ay arkayeen nin lala xaali karo, hase yeeshee taasi uma muuqan mana joojin Booliska midab takoorka. Marka arrintiisii la baadhayna waxa la ogaadey in Biikoo nabarro ba'ani ay madaxa ka gaadheen. Dacwaddiisana aad ayaa loola socdey waxase amankaag noqotey garsaroorihii dacwaddaa qaadayey inuu xukumo oo ku dhawaaqo «geeridii Biiko cidna looma qabsan karo».

Xukunkaasi markii uu dhacay, ayaa dhawr boqol oo Afrikan ahi ay ku soo urureen goobtii dacwadda lagu qaadayey waxana iyagoo gacmuhu u duuban yihiin ay ku dhawaaqeen: «Stiif Biiko ayay dileen». maxaannu samaynay? «Ma midabkayaga madow baa dembi nalooga dhigay». Waxa halkaa dabeed la keenay ciidanweyne Boolis ah oo ay wata. Xukunka ku dhawaaqiddiisa waxa ka soo beegmay warar waddaniyiinta Afrikanka ay soo saareen oo sheegayey in magaalada Soweeto lagu qabtay Kay Biiko oo ay Stiif Biiko walaalo ahaayeen iyo Soloman Biiko oo ilmaadeer ahaayeen iyo waliba dad kaloo ka tirsanaa dhaqdhaqaaqa dadka madow, ururkii uu asaasay Biiko, dhowaanna dawladda Midabtakoorku ay baabi'isay.

Qareenkii ama qoyskii Biiko wuxu ku eedeeyey Booliska midabtakoorka inaanay runta ka sheegin dacwaaddii Biiko markay ka hadlayeen maxkamaddii lagu baadhayey arrintaas. Qareenka wuxu tilmaamay in rag dhakhtarro ahi ay ka maragkeceen in Biiko u go'ay ugu yaraan saddex nabar oo maskaxda ka gaadhey. Qareenka, Mr. «Kentridge», wuxuu kaloo sheegay in nabarradii kalee kelyaha kaga yaalley iyo astaamihii kalee lagu arkay loo aanayn karo nabarradii maskaxda.

# Warfidiyeennadii Shiinaha



Wafdi Warfidiyeen oo ka socda Jamhuuriyadda dadka ee Shiinaha, oo uu hoggaaminayo, ku-xigeenka agaasimaha Xafiiska Dhexe ee Idaacadaha dalkaas, Waa Shou Jeen, ayaa 21-kii Diisamber waxa u dhammaatay, booqasho 7aad ahayd oo ay ku yimaadeen JDS, iyagoo kulammo la yeeshay madax ka tirsan Xisbiga iyo dawladda Soomaaliyeed. Waxa kaloo ay wadahadallo la yeesheen Guddiga dhexe ee ururka suxufiyiinta Soomaaliyeed (SOJA). Warfidiyeennadaas waxa qaabilaad Xafiiskiisa ugu sameeyey Wasiirka warfaafinta iyo hanuuninta dadweynaha Jaalle Cabdiqaasim Salaad Xasan. Wasiirku wuxuu ka warramay saaxiibtinimada qotada dheer ee ka dhexaysa JDS iyo J.D. Shiinaha. Horumarka ay Soomaaliya gaadhay iyo dhibaatooyinka Geeska Afrika oo uu yidhi waxa huriyey Ruushka iyo kuwa qoolka ugu jira sida Kuuba. Jaalle Cabdiqaasim wuxuu kaloo warfidiyeenka u faahfaahiyey sababaha Soomaaliya ay u baabi'isay heshiiskii saaxiibtinimo ee Ruushka, xidhiidhkii diblomaasigana ugu goysey Kuuba. Go'aankaasi wuxuu ka dambeeyey buu yidhi markii uu kashifmay oo laga warhelay, qorshe ku saabsan weerar loo dhan yahay, oo ay dalalkaas u maleegeen Soomaaliya, ujeeddadiisuna ahayd in Ruushku hantiyo marinnada badda cas iyo badweynta Indiya, iyo in halis la geliyo jiritaanka JDS. Wuxuu intaa ku daray Wasiirku in dadka Soomaaliyeed dhib kastaa ha ka soo gaadhee ay diyaar u yihiin daafacaadda dalkooda. Hoggaamiyaha wafdiga Shiinuhu, wuxuu isna sheegay in xidhiidhka JDS iyo Shiinuhu uu maalinba maalinta ka dambaysa sii xoogaysanayo. Wuxuu kaloo sheegay labada dadba inay arkeen

oo *tijaabiyeen* Siyaasadda aan hufnayn ee Ruushka, guushana ay ku dambayn doonto Soomaaliya, Shiinaha iyo dadyowga xuquuqdooda u diriraya. Jaalle Wang Shu jen waxa hantiwadaagga Ruushka uu ku tilmaamay mid aan dhab ahayn, saldhiggiisuna yahay danaysi, waxana uu raaciyey in dawladda Ruushku ay meel dhigatay ku dulnoolaanta iyo dhiigmiirshada dalalka soo koraya iyo dadyowga gobannimadooda u dagaallamayo.


Waxa kaloo isna xafiiska warfidiyeennada ku qaabilay Guddoomiyaha hoggaanka Idiyooloojiyada Jaalle Maxamed Adan Sheekh.

Jaalle Maxamed wuxuu uga warramay hawlaha xisbiga iyo wargeyska HALGAN ee afka Xisbiga ku hadla. Waxa kaloo guddoomiyaha hoggaanka Idiyooloojiyada uu la falanqeeyey wariyeyaasha Shiinaha xaaladda Geeska Afrika iyo saaxiibtinimada labada dal, gaar ahaanna kaalinta la taaban karo ee dawladda Shiinuhu ay ka qaadatay horumarinta JDS.

Hoggaamiyaha warfidiyeenka Shiinhu wuxuu ka mahadcelіyey sidii diirranayd ee dadka iyo dawladda Soomaaliyeedba ay u soo dhoweeyeen.

Warfidiyeenkaasi waxay hore u soo booqdeen Suuriya iyo Tuunisiya.

# Booqashadii Mudanayaasha Mareykanka



17kii Diisambar ayaa laba mudane oo Maraykani, Paule Tsongas iyo Don Bonker, booqasho laba maalmood ah ku yimaadeen magaaladan Muqdisho, waxaanay sheegeen in ujeeddada socdaalkoodu tahay inay ilaa leeyaan xaaladda ka taagan Geeska Afrika. Waxa labaduba ay muujiyeen siday uga walaacsan yihiin siyaasadda Ruushka ee Geeska Afrika. Don Bonker ayaa yidhi «Maraykanku wuu ka walaacsan yahay joogidda, ujee, ddooyinka iyo qorshaha Ruushka ee Geeska Afrika», wuxuuna ku daray in meeshii Ruushku cag dhigaba dhiig iyo xiisad aan laga waayin. Mudane Bonker wuxuu ku taliyey Afrikaanku inay ku wanaagsan tahay in Ruushka ay u jilib dhigaan oo raacaan tallaabadii ay qaadday Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed. «Xaaladda Geeska Afrika waa arrin Afrikaan loomana baahna in dalal aan Afrikan ahayni ay soo faragеliyaan ayuu raaciyey. Magaalada Nayroobi waxa labada Mudane ay hore uga shgeen siday uga fajaceen ugana naxeen argagaxa ay Addisababi ku jirtay sidey iyaba ku tilmaameen halkaasoo ay ku arkeen meydkii sagaal qof oo ka mid ahaa 300 ee dhawaan uu gumaaday taliska Addisababa.

Shir ay la yeeshee Madaxweynaha J.D.S., Jaalle Maxamed Siyaad Barre, waxa lagaga wada hadlay arrimo ku lug leh xidhiidhka Soomaaliya iyo Maraykanka, gaar ahaan xaalka Geeska Afrika iyo arrimaha kalee muhiimka ah ee adduunyada. Wax yar ka hor gebagebadii socdaalkooda iyagoo warfidiyeenka la hadlaya labada Mudane waxay sheegeen in ay u bogeen wada hadalladii ay la yeesheen Madaxweynaha J.D.S. Jaalle Siyaad iyo madaxda kalee Soomaaliyeed. Don Bonker wuxu tilmaamay siduu ula dhacay hawlaha dadka Soomaaliyeed ugu jiraan horumarinta dalkooda. Isagoo ka faalloonayey wadahadalladii ay la yeesheen madax ka tirsan Dawladda Soomaaliyeed wuxu sheegay in Soomaaliya ay doonayso dalalka Afrikaanku inay nabad ku wada noolaadaan, taasoo qiimo u leh Qaarradda Afriki siday horumar u gaadhi lahayd.

«Soomaaliya», ayuu yidhi Mudane Bonker, «sida Maraykanka ayay aad uga walaacsan tahay sida Ruushku u soo faragelinayo arrimaha Afrika, gaar ahaanna Geeska Afrika».

Waxa kaloo mudanahaa Maraykanku ka digey halista Geeska Afrika kaga iman karta hubdaldalidda xagga cirka ah ee Ruushku ka soo buuxiyey Taliska Addisababa iyo joogitaanka millateri ee Ruushka ee ku soo kordhaya Itoobiya. Isagoo ka warramaya sida Xabashidu ugu tumatay xuquuqda aadamiga.

# Booqashadii Hoggaamiyaha Jabhadda Xoraynta ee Eriteriya

Hoggaamiyaha Jabhadda Xoraynta Eritreya (ELF-PLF) Cusmaan Saalax Sabi, ayaa 17kii Diisambar booqasho ku yimid Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed. Mudane Sabi wuxu markaa sheegay in booqashadiisu ay ku taxan tahay socdaal uu ku marayey dhawr dal oo carab ah oo uu Madaxdooda kala hadlayey xaaladda geeska Afrika. Waxa uu yidhi dadka reer Eriteriya aad ayay u ogsoon yihiin uguna hanweyn yihiin taageerada ay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed siiso halganka ay gobannimadooda ku soo dhacsanayaan, waxaanu intaa ku daray in halganka Soomaalida la diriraysa gumeysiga xabashida iyo kan dadka reer Eritriya isku mid yihiin.

Xaaladda Geeska Afrika markuu ka hadlayey wuxu ku nuuxnuuxsaday in ay lagama maarmaan tahay xoogagga shisheeyuhu inay dibadda ka joogaan oo aanay soo faragelin arrinta Geeska ayna ka digtoonaadaan taagridda gumeysiga Addis Ababa. Wuxu u tilmaamay xoogagga horusocodka ah ee adduunka oo dhan inay taageeraan halganka ay ku jiraan maanta jabhadaha Soomaaliyeed ee gobannimadoonku.

Al Sayid Sabi wuxu kaloo ku dhawaaqay in dadka reer Eritereya ay guulo badan halgankooda ku soo hooyeen, immikana ay qarka u saaran yihiin xornimo buuxda. Waxa kaloo hoggaamiyuhu uu sheegay inuu u bogey kaalinta dalalka Carabtu ay kaga jiraan halganka jabhadaha Eriteriya iyo Soomaali Galbeed. Jabhadaha Xoraynta Eriteriya waxay dhowaan ku heshiiyeen inay dawlad madaxbannaan ka dhisaan Goobihii la xoreeyey. Raadiyowga kuweyt oo laga dhegeystey magaaladan Muqdishu wuxu sheegay in goobahaa la xoreeyey laga dhisay guddiyo maamul oo horumarinta qaabbilsan. Waxaanay Jabhadahu immika ku fooggaan yihiin dhisidda cusbataallo, dugsiyo iyo hagaajinta isgaadhsiinta meelaha la xorreeyo.

Jabhadda ELF waxay sheegtay in taliska Addis-Ababa aan awoodi karin in uu soo fargeliyo arrimaha dawladda Eriteriya lagu tala jiro in la dhiso. Hoggaamiye ka tirsan jabhaddaas ayaa waraysi dhowaan lagu fafiiyey Muqdishu ku sheegay in ciidamadiisu ay khasaare laxaad leh ciidammada Addis Ababa ugu geysteen koonfurta xaruunta Asmara.

Axmed Naasir oo ka mid ah madaxda xoghaynta jabhadaha Eriteriya ayaa dhowaan ugu warramay wargeyska ka soo baxa kharduunm in Soomajeestayaashiisu ay 730 askari xabashida kaga dileen, 1080-na kaga dhaawaceen dagaallo ka dhacay magaalooyinka kale ahi Adiqraat iyo Senefe Soomajeystayaashu waxay dagaalladaa ku qabsadeen saddex Taangi iyo hub kaloo fara badan markii xabashidu ay isku dayeen inay jebiyaan gidaarka lagu wareejiyey Asmara. Wuxu sheegay mudane Naasir in taliska Addis-Ababa uu qorsheeyey inuu qaybiyo Eritriya oo degmooyinkeeda koonfureed ay ku darto gobolka Tegre ee ay jaarka yihiin, hase yeeshee, qorshahaas annaga ayaan oggolayan ayuu yidhi.

# Wafdi Soomaaliyeed oo Booqday Mareykanka

Wasiirka Macdanta iyo Biyaha Jaall Xuseen Cabdulqaadir Qaasim iyo wafdi uu hoggaaminayo, ayaa ku soo laabtay magaaladan Muqdishu, 18kii Disambar, markii ay u dhammaatay, 10 maalmood oo booqasho rasmi ah ay ku jooggeen dalka Maraykanka.

Warfidiyeenka isagoo ugu warramayey xafiiskiisa Jaalle Xuseen wuxu sheegav in wadahadalladii uu la yeeshay madaxda Maraykanku ay ahaayeen kuwo midho dhaliyey wuxuu kaloo soo qaaday in booqashadaasi ay la socotey siyaasadda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed ee ah in xidhiidh wacan lala yeesho quruumaha iyo dawladaha adduunka oo dhan. Isagoo ka hadlaya soo faragelinta Ruushka iyo kuwa ku daba tukada ee arrimaha Geeska Afrika Wasiirku wuxu sheegay in welwel weyn ay ku hayso Maraykanka iyo dawladaha kalee dunida.

Jaalle Xuseen waxa mar kale uu Ruushka iyo kuwa uu cagaha ku qaato uga digey in ay ka waantoobaan soo faragelinta arrimaha Afrika. Wuxu sheegay Wasiirku in shixnadaha hubka ah ee Ruushku Xabashida cirka iyo haddaba u soo marinayaa ay walaac ku hayso dalalka soo koraya wuxuuna intaa ku daray Ruushka inay ku wanaagsan tahay inuu saxo siyaasaddiisa ma-

jare habawday ee ku saabsan Geeska Afrika. Su'aalo la weydiiyey isagoo ka jawaabaya waxa Wasiirku dicaayad jaban oo rakhiis ah ku tilmaamay haddallo dhowaan Ruushka ka soo yeedhay oo ah in Soomaaliya kaydkeedii weynaa ee macdanta Uranium ay gacanta u gelisey Maraykanka waxa uu yidhi Wasiirku «dadka Soomaaliyeed iyagaa xaq u leh oo og siday uga faa'iidaysanayaan macdantooda iyo ciddii adduunka ay arrintaa la kaashanayaan. Ruushkana cidi uma wacan inuu nagala taliyo ciddaannu wax la qabsanayno. « Wuxu caddeeyey Wasiirku in macdanta badda iyo dhulka Soomaaliyeed ay hodonka ku yihiin ay leeyihiin dadka Soomaaliyeed oo keliyihi ee aan cid kale la wadaagin wuxu ku tilmaamay Jaalle Xuseen in Ruushku markii uu Soomaaliya siyaasadihiisa marsiin kari waayey loona diidey. siduu Xabashi ka helay in dhulka Soomaaliyeed uu saldhigyo ka samaysto uu dan moodey dicaayado aan qiimo lahayn oo ka fidiyo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed.

Wuxu Jaalle Xuseen Carrabka ku adkeeyey in Soomaaliya si dhexdhexaadnimo ah ay xidhiidh wanaagsan oo xagga dhaqaalaha iyo siyaasadda ahba ay la yeelan doonto dalalka dunida sida ay ku dhawaaqayaan axdigii Koobaad, kii Labaad iyo kii Saddexaad ee Kacaanku.

Soomaaliya waxay ka mid tahay dalalka dhexdhexaadka ah, si xoog lehna waxay uga qaybqaadatay kor u qaadidda siyaasaddaas oo ku nuuxnuuxsanaysa in dal walba xaq uu leeyahay qorshaynta siyaasadiisa iyo inuu xor ka ahaado raadadeynta dalalka xoogga waaweyn.

# GEERI NAXDIN LEH

**Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waxay xalay go'aan ku gaareen in muddo saddex maalmood ah tacsi heer qaran ah loo dhigo Jaalle S/Guuto Cali Mataan Xaashi oo ka tirsanaa Golaha Dhexe ee X.H.K.S. oo shalay saacaddu markey ahayd 16kii galabnimo ku geeriyooday cusbitaal ku yaal Dalka Talyaaniga magaala madaxdiisa Rooma.**

**Cali mataan Xaashi Cilmi wuxuu Sannadkii 1927kii ku dhashay Degmada Hobyo oo ka tirsan Gobolka Mudug.**

**Jaalle Cali Mataan Xaashi wuxuu ka mid ahaa halyeeyadii dhaliyey Kacaanka 21kii Oktoobar 1969kii, 1970kii waxa uu qaatay darejada Gaashaanle Sare.**

**Guddoomiyaha Hoggaanka Idiyoolajiyada Ku-xigeenka Guddoomiyaha, Guddiga Qoraalka wargeyska Halgan iyo Hawlwadeennada Hoggaanka Idiyoolajiyadu waxay ka tacsiyadaynayaan qoyskiisii, carruurtiisii, iyo Ummadda Soomaaliyeedba geerida ku timid jaalle Cali Mataan Xaashi.**



## Aragtida Cilmiga ah

# Diyaarinta Kaadarka

**Yaasiin Sheekh Muuse**

Kaadarku waa arrin muhim u ah xaqiijinta kaalinta hoggaaminta xisbiga; wax baridda iyo diyaarinta kaadarku waa qayb ka mid ah horumarinta habka siyaasiga ah ee bulshada; gaar ahaan hoggaaminta cilmiga ah ee lagama maarmaanka u ah hawlaha xisbiga dawladda iyo guud ahaan maamulka dhaqaalaha si loo dhiso; bulsho hantiwadaag ah ee horumarsan udub dhaxaad waxaa u ah habka dhaqaalaha iyadoo ay jirto in ay dhinacyo kale ay ka kooban tahay nolosha bulshadu, kuligoodna waxay isku yihiin hab kaliya.

Dhinacyadaas faraha badan ee uu ka kooban yahay horumarku gaar ahaan mid kasta wuxuu u baahan yahay hoggaamin cilmi ah ee lagu wado hawlaha bulshada, laguna sugo haqabtirka horumarinta waxyaalaha gaarka u ah hawlaha dhaqaalaha, horumarinta qalabka iyo tegnikeda.

Sidaas darteed waxaa caddaana in hawlahaas oo dhammi u baahan yihiin in la hoggaamiyo taasi la'aanteedna ma suurto galayso dhan kasta in laga haqabtiro ka faa'iideysiga qawaaniinta mawduuciga ah ee Hantiwadaagga cilmiga ah.

Hoggaaminta cilmiga ah ee bulshada waxaa ugu muhiimsan joogtaynta qorshaha, tababaridda iyo dhameystiridda kaadarka. In laga gaaro guul hawl kasta waxaa ay ku xiran tahay in si hagaagsan oo sax ah loo xulo kaadarka iyo wax baridda siyaasadda iyo aydolojiyada, kaddibna laga soo saaro xeeldheerayaal kaadar ah, laguna kala aaddiyo kuwooda ugu firfircoon hawlaha u baahan hoggaaminta adag ee ka maarmin kaadar fulin kara go'aanada iyo waajibaadka gaarka ah.

Shaqada kaadariintu guud ahaan wey isku xiran tahay, mana kala dhiganto. Sidaas darteed waxaa loo baahan yahay in xubnaha hoggaamintu fiiro iyo dhug gaar ah u yeeshaan kaadarka ayna soo saaran go'aanno wax ku ool ah laguna fuliyo waajibaadka hawlaha kor ku xusan. Si loo helo ayna u suurto gasho kala tilmaamidda iyo kala sifeynta hawlahaas wada jira iyo waajibkooda ee ah shaqada kaadarka; waxaa marka hore u baahan in si quman loo fahmo qaymaha iyo macnaha cilmiga ah ee ay leedahay erayga «Kaadar» kaddibna shaqada kaadarka.

Marka ugu horeyn aynu eegno xaqiiqda macnaha dadku ay u kalayaqaaniin erayga kaadar; iyadoo aynu u dhug yeelanayno macnaha kala duwan ee ay isu soo dhalan rogtay iyo waqtiyada kala duwan ee ay soo martay tan.

Erayga «KAADAR» asalkiisii hore waa eray faransiis ah, macnihii loo yaqiin ee loo isticmaali jirayna waa macno milatari, kaas oo ah «Cuntub ama Koox»; milatari ah, kana kooban askar aqoon u leh xirfad gaar ah. Sida badan waxaa erayga loo nisbeyn jiray saraakiil xigeenada iyo saraakiisha, macnahaas wali ilaa maanta waa loo isticmaalaa hawlaha milatariga.

Waqtiyo badan markay erayga soo gudubtay, waxaa la bartay in dhinacyo kale loo isticmaalo oo ka mid ah hawlaha bulshada si tartiib tartiib ah ayaa waxay soo gashay in loo isticmaalo dhaqdhaqaayadii shaqaalaha. Inkastoo si kale macnaheedii loo isticmaalay muddo dheer kaddibna uu is baddelay dulucdiisii.

Intii aanay ku guuleysan xukunka dabaqadda shaqaaluhu, marka loo eego waqtigaas, waxaa erayga «Kaadir» loo nisbayn jiray loona yaqiin hawlwadeenada hoggaanka u haya xisbiga iyo ururada bulshada, laakiinse markay ku guuleysteen curinta kacaan hantiwadaag ayadoo ay horseed ka ahaayeen shaqaale, beeraley iyo horusocodka kacaamiinta ah, waxaa intaas ka sii ballaartay macnihii eraygaas ee ku koobnaa hawlwadeenada hoggaaminta.

Sugidda macnaha, dhuuxa erayga kaadar marka laga baaro abwaanada siyaasadeed si dhameystiran ugama bixiyaan taswiir cad macnaha erayga, kuwase ugu dhaw qaarkood waxay qoraan sidatan kaadar waa koox dhallinyaro hawlwadeen ah soona qaadatay tababarro qorsheysan kana kala haya wawlo kala duwan dhinacyada ay ka kooban tahay nolosha bulshadu (Xisbiga dawladda, iyo xubnaha dhaqaalaha dalka)

Tacbiirkaasi ma ah mid intaasi ku ebyan; laakiinse macnuhu intaas wuu ka sii sino ballaaran yahay waxaana la oran karaa «Kaadar» waa dad koox ah oo qaatay tababar siyaasadeed iyo aqoon xirfadeed lehna karti ay ku hoggaamiyaan dadkka intiisa kale, marka la fulinaayo waajib iyo xil la hor dhigay,

ama marka laga shaqeynaayo meel hawl hoggaamin u baahani ka socoto». Meelaha hawlahaas laga qabanaayo xilkoodu wuxuu kala noqon karaa mid la isu doorto ama la magacaabo.

Si loo garto inta kaadar loo yaqaan waxaa lagama maarmaan ah in kaadarka lagu xisaabo in ay ka mid yihiin cid kasta oo ah xooga-gga ugu muhiimsan dabaqadda shaqaalaha iyo dadweynahaba ee karti iyo awood u leh marka loo eego tababarkooda iyo aqoonta ay u leeyihiin xirfadooda ayna weliba u dheer tahay baraatikada iyo waayaaragnimadooda ee geysisiinaysa in ay kari karaan abaabulka hogaaminta iyo fulinta waajibaadka; kuwaasoo ku saabsan arrimaha mawduuciga ah ee ka dhalanaya dhinacyada kala duwan ee nolosha bulshada.

Astaamaha lagu aqoodo kaadarka waa sida tan:

Aaminsanaanta mabaadii'da dabaqadda shaqaalaha, mintidnimo kacaan, gareysanaan mas'uuliyad, talo keenid meel mar ah, dhiiranaan go'aan qaadasho, qof karameednimo, hawl jacalylnimo, waligii u heelanaan tiigsashada kor u qaadidda barashada iyo garashada aqoon hantiwadaagga cilmiga ah iyo aqoonta la xiriirta xirfadiisa, barashada hoggaaminta iyo wax baridda. Astaamahaas waa kuwo muhim ah, waajibna ay tahay in laga kalo hawlwadeen kasta oo hoggaamiye ah, doonayana in uu u qalmo, amaba guto waajibaadka dhismaha bulsho ku horumarsan habka hantiwadaagga.

Markaa haddii aynu garanay macnaha iyo astaamaha kaadar, loo yaqaan inta kaliya ee ah hawl wadeennada haya hoggaanka shaqada.

Si kale waxaa qalad ah, sida baraatikada lagu arko in lagu tilmaamo kaadar qof kasta oo shaqeeya ama ah shaqaale ah. Sida uu qabo cilmiga hantiwadaagga kaadar: waxaa lagu tilmaamaa:

— Farsamayaqaanada culuunta kala duwan iyo teknikada.

— Injineerada.

— Aqoonyahannada.

— Arkitektar iwm.

Sida kale waxaa lagu daraa kaadarka hawlwadeen kasta; kuwaasoo si ay u gutaan xilkooda bulsha, markaa u baahan tababar gaar ah oo cilmi ah.

Tababarka iyo kafaa'idaysiga ama ku adeegidda howlwadeenka marka laga eego waayaha hantiwadaagga waa ka duwan yahay midka hanti goosiga, waayo hantiwadaagga wuxuu ku fuliyaa kuna qotomiyaa nidaam qorsheysan walina si nidaamsan ula socdaa sida ay tahay baahida kaadarka ee bulshada inta ay la egtahay.

Kaadarka kacaanka Hantiwadaagga ah, waxaa garbaha ka saaran xil culus, kaas oo ah mas'uuliyad weyn ee la xiriirta horumarinta cilmiga iyo teknikada iyo xalinta waajibaadyada kala duwan ee bulshada, marka laga eego horumarka deg degga ah ee la xiriira xoogga wax soo saarka iyo kacaanka cilmiga teknikada. Sida runta ah ma aha wax iskeeda isaga taagan oo gooni u jirta, waxayse tahay wax lagu dhaqan geliyo wax kale oo la taaban karo.

Gudashada xilka hoggaaminta waxay doonaysaa in la yeesho ilaa heer aqoon gaar. Taa macnaheedu waxay tahay in uu soo maray xirfad yaqaanku tababar cilmi ah iyo aqoon xirfadeed.

Horay ayaa qoraalo badan looga hadlay erayga macnaha kaadarka iyo sida loo isticmaalo, waxayna kala leedahay erayo kala duwan iyo macno kala duwan ee loo kala isticmaalo, sida:

Kaadarka siyaasadda, Kaadarka shaqada ama shaqaalaha. In kastoo dhanka baratikada ay adag tahay macnayaashaas midba midka kale in laga duwo, haddana isla markaa ma jiro mid mid la mid ah.

Si aan u caddeyno arrimahaas waxaan tuusaalo u soo qaadan karnaa: Siyaasadda Xisbiga iyo shaqada Xisbiga.

Siyaasadda xisbiga macnaheedu ballaaran wuxuu ku idil yahay waajibka siyaasadeed ee xisbiga; taasoo ah taatikada iyo istaratiijiyada xisbiga. Sidoo kale shaqada xisbiga dulucdeedu waxay tahay hirgelinta siyaasadda, hoggaaminta bulshada iyo hirgelinta howsha iyo waajibadka xisbiga nooga aadan iyo dhinacyada kala duwan nolosha bulshada. Tan iyo hadda waxaynu si guud u soo aragnay ahmiyadda macnaha iyo qawaaniinta guud ee la xariirta kaadarka, waxaana inoo dhiman in aynu isla eegno si cilmi ah wax barashada kaadarka iyo qeybahooda kala duwan ee la xariirta nolosha bulshada, arrimahaas waxaynu ku soo qori doonaa cadadka xiga oo midkaan.

## Hiddaha iyo Dhaqanka

# Kaydinta Taariikhda Soomaalida

*Ibraahim* **Cawad (Kholi)**



Maqaalkani waa qaybtii ugu dambaysey maqaalladii aan kaga faalloonayey waxtarkii qorista af Soomaaliga. Maqaalkii ugu horreeyey (HALGAN Oktoobar) wuxuu ku saabsanaa taariikhdii qorista af Soomaaliga, gaar ahaanna waxtarka qorista afku u yeelatay is-afgarashada oo sal u ah macaamilada bulshada iyo xiriirka ka dhexeeya dawladda iyo dadweynaha. Maqaalkii ku xigeyna waxaan kaga hadlay kaalinta ay afka qoristiisu kaga jirto «baahinta tacliinta iyo korinta af Soomaaliga laftiisa». Maanta waxaynu isla eegaynaa waxtarka afka qoristiisu u leedahay «KAYDINTA TAARIIKHDA SOOMAALIDA».

Haddii aad doonaysid inaad muujisid waxtarka qorista afku u leedahay taariikhda, hor iyo abbaato waxaa lagama maarmaan ah inaad u kuur gashid micnaha ereyga «Taariikh», adigoo is weydiinaya su'aasha ah: «Waa maxay taariikhi?» Taariikhdu waxay u kala baxdaa mid dad iyo mid dabeecadeed. Taariikhda dabeecaddu waxay ku saabsan tahay xilliyada isbeddelaya, dhulka goglan iyo dhirta iyo buuraha ka guud baxay, cirka gawdiida iyo badaha iyo webiyada guuxaya, xayawaanka jaadad-ka badan oo ku kala nool biyaha iyo dhulka, iyo aafooyinka adduunka ku dhacaya oo aadmigu weli cirirkooda bixin kari waayey. Taariikhda dadkuna waxay ku saabsan tahay lana xiriirtaa nolosha aadmiga. Sidaas darteed, gef ma aha haddii aynu niraahno: «Intii adduunku jireyba taariikhdu way jirtey, iyadoo u kala qota dheer sidii adduunka loogu soo kala horreeyey amaba loo kala da'weyn yahay». Labada noocse ma kala maarmaane midiba midda kale ayay saamaysaa.

Arrintu iyadoo sidaas ah, haddii aynu barbar kale ka eegno, taariikhdu waxay u kala baxaysaa mid qoran iyo mid aan qornayn. Hase ahaatee, taariikhda ka horreeysey intii aadmigu bartay qorista ama sawiriddaba way dabar go'day waxayna la mid tahay taariikh aan jirin, marba haddii aan la xusuusnayn oo aan waaya-aragnima ahaan looga faa'iidaysan karin. Waaya-aragnimadii dabar go'day intii aan la taariikhayni waxay la mid tahay xareed gurtay intii aan beesha oommani soo gaarin; waa bar-kumataal.

Haddaba aynu iska illowno oo ka hadalno taariikhda qoran. Taas ayaana ugu wacan inay taariikhha ummadaha maanta adduunka ku nooli una kala qota dheeraadaan oo u kala da'weynaadaan hadba sidii qoristoodu u kala horreysey. Taas ayaa ugu wacan in

ardayda dunida la wada baro ilbaxnimadii Giriigga, tii Roomanka iyo tii Masaariyada. Marba haddii aynu isla garannay wax-ku-oolnimada taariikhdii hore oo qoran amaba tan weli la xusuusan yahay, waxaa iyana lama huraan ah in aynu dib u jalleecno taariikhda Soomaaliyeed iyo kaalinta ay kaga jirto taariikhaha ummadaha adduunka.

Haddii aad ku meertid madxafyada adduunka adigoo baadi doonaya da'da iyo mug weynida taariikhda Soomaaliyeed, waxaan shaki lahayn inaadan si sahlan u helayn **raadkeedii hore,** sababtu waxaa weeye qoris la'aantii af Soomaaliga. Waa dhici kartaa inaad madxafyada qaarkood ka heshid wadiiqa yar oo ku aroora taariikhdii iyo ilbaxnimadii hore ee Soomaalida, laakiin ma noqon karo budul kuu geeya war tifaftiran oo aad kaga bogatid taariikhdii hore ee Soomaalida. Xitaa haaddii aadan sidaasba u sii hanweynaan oo aad baadi doontid taariikhda casriga ah ee Soomaaliyeed, wax badan ka heli maysid. Wixii aad heshaana waa wax ay qoreen nimankii shisheeyaha ahaa ee uu gumeysigu sahanka u soo dirsaday dhawrkii qarni oo tegey. Maadaama ay u-jeeddo gumeysi ka lahaayeen, waxyaabihii ay qoreen ma noqon karaan kuwo saldhig u noqon kara taariikhda Soomaaliyeed, haddii laga eego dhinaca tirada, kan tayada iyo dhinaca runnimadaba. Maadaama aan marna si fiican loogu haqab beeli karin af shisheeye, kutubta Soomaalidu qortay oo ku qortay af shisheeye waa far-ku-doon. Tacliintii gumeysiga laga dhaxlayna ma gaarsiisnayn heer Soomaalida lagu canaanan karo: «Maxay wax u qori waayeen?» Cid kastaaba ha qortee, qoraalka taariikhda casriga ah ee Soomaaliyeed aad iyo aad buu u yaryahay. Raamayaal muhiim u ah nolosha ummadda Soomaaliyeedna waxbaba lagama qorin. Waxaa tusaale u ah in aan ilaa maanta waxba laga qorin halgankii Xisbigii Dhallinta Soomaaliyeed (SYL 1943-60) iyo toban guuradii ka dambaysey gobannimadii 1960. Intii Kacaankii Oktoobar 1969 curtay uu qoray af Soomaaliga kutub door ah ayaa la qoray oo u badan murtida iyo maaweelada, tacliinta (ilaa dugsiga sare) iyo labo diiwaan oo ku saasan halgankii Daraawiishta oo uu abbaan duulaha u ahaa Sayid Maxamed Cabdille Xasan (1900-1921). Labadaas Diiwaan waxaa lib iyo galladba ku leh Jaalle Aw Jaamac Cumar Ciise oo tuldihiisii xaraashay si uu u ururiyo taariikhda Kacaankii Daraawiishta. Labaatan sano kaddib wuxuu qoray labo Diiwaan oo mid yahay gabayadii Sayidka midna yahay taariikhdii Daraawiishta. Taas micnaheedu ma aha in taariikhdii Daraawiishtu halkaas ku abyan tahay; waxaan uga gol leeyahay inaan idin dareensiiyo inuu Aw Jaamac dadaaley loona baahan yahay in dadaalka halkaas laga sii wado. Akademiyada Dhaqanka iyo Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarintuba, iyaguna, way dadaaleen haddii loo eego mugga iyo dhaqaalaha dabraya.

Waxaanse ku guubaabinayaa odayaashii asaasay SYL oo hadda cimrigoodu gabaabsi yahay iyo odayaashii nasiibka u yeeshay inay hoggaamiyaan dawladihii ugu horreeyey, inay qoraan kutub ay kaga warramayaan wixii ay ka xusuusan yihiin halgankii Soomaaliyeed iyo marxaladihii ay goobjoogga ka ahaayeen, dhan gobannimo, dhan dhaqaale iyo dhan dhaqanba. Haddii nin waliba qoro xusuussuustiisa waxaa lagala soo dhexbixi karaa fikrado meel mar ah haba kala dhantaallaadeene. Markii aan maqlo, «waxaa geeriyoodey oday hebelba,» waxaan ka murugoodaa xog-ogaalnimada uu la god-gelayo.

Dhallinta indheergaratada ah laftigooda kaalin weyn ayaa sugaysa. Haddii ay yihiin dadkii aqoonta lahaa ee hor iyo abbaato la kulmay fursaddii qorista Af Soomaaliga, waxaa la gudboon inay ururiyaan taariikhda iyo murtida Soomaaliyeed. Indheergaratada si fiican u taqaan afafka shisheeyaha, waxaa kale oo la gudboon inay tarjumaan kutubta ilbaxnimada iyo cilmigaba ah oo dugsiyada laga dhigto; taasi waxay waxtar weyn u yeelan kartaa ballaarinta aqoonta ardaydeenna hadda afka hooyo wax ku barata laakiin aan haysan kutub badan oo ay akhristaan. Odayada reer magaalka ahaa oo maalin walba geeriyoonaya, lana leeyahay: «wuxuu ka tegey intaas oo digtoor iyo intaas oo diritoore» waxaa laga filayaa in xogogaalnimadii laga qoray oo kutub laga samayn doono markii fursad dhaqaale la helo.

Dhinaca xukuumadda waxaa loo ga baahan yahay dhiirri gelin si ay u sahlanaadaan dabiicadda iyo ururinta taariikhda iyo murtida Soomaaliyeed. Tallaabooyinka xukuumadda ku habboon waxaa ka mid ah in dhaqso loo sameeyo sharcigii lagu daryeeli lahaa xuquuqda qoraaga (copy right law)

Hadal iyo murti, wax waliba waxay leeyihiin weel, sida caana loogu kaydsado looguna dhitaysto dhiilaha, ayaa qorista afku u tahay weelkii lagu kaydinayey taariikhda iyo murtida Soomaalida.



# Fanka Muuqaalka

Cabdulqaadir (Bufalo)

Fanka Muuqaalku wuxuu ka mid yahay waxyaalaha wax laysku gaarsiyo kuwa ugu sarreeya, ugu qaaya weyn uguna fil weyn. Bal aynu isku deyno inaynu mid mid u fasirno tilmaamaha aynu halkan ka bixinay annagoo xiganeyna taariikhda taxanaha ah ee aadamiga iyo fakarkiisa.

Fanku sidiisaba wuxuu muuqal cad oo aan fasirid u baahnayn (dabcan qofka aan dareen fanni ah lahayn wuu u baahan yahay) ka bixiyaa shucuurta iyo dareenka fanaanku ama mujtamacaa isaga ahi qabo iyo duruufta uu soo maro wakhtiga ka dambeeyay marka dadyowgii hore noloshooda fikirkooda himilooyinkooda, naceybkooda iyo jaceylkoodaba waxay nagu soo gaarsiiyeen fanka muuqaalka, ayagoo isticmaalaaya xubnaha uu ka kooban yahay fankaa isaga ahi siiba: Taswiirta Gacanta, qorridda, xardhidda iyo arkitetuurada.

Waxaas oo dhami waxay ina tusaaleynayaan siyaalaha ay u noolaan jireen, ulajeeddooyinka ay ka lahaayeen nolosha, wakhtiga asaga ah siduu ahaa habka dhaqan dhaqaale ayadoo had iyo jeerba muuqanaysay fikradda ama heerka uu ka taagan yahay mujtamaca asaga ah koritaankiisa xag aqoon iyo wacyiba. Waayo waa wax ku beeran qofka aadamiga ah inuu ku dadaalo siduu u raad reebi lahaa, ama farriin uu ugu gudbin lahaa dadka ka dambeeya isla mar ahaanntaasina uu fanaanku asagoo iska tarjumaaya kana wakiil ah mujtamaciisa micne ama ujeedo ugu yeeli lahaa jiritaankiisa.

Sidaannu horey u niri tan iyo intii noloshu jirtey ama ruuxa aadamigu wuxuu gartay inuu u baahan yahay in uu dadka kale gaarsiiyo dareenkiisa iyo waxyaalaha uu arko iyo siduu u arko. Sidaasi ayey u dhasheen qaababkii fanka ama fannaankii u horreeyey oo aan hubno in ay ka da'weyn yihiin farta la qoro. Taasina waxaa lagu arki karaa meel kasta oo la joogo dunida aannu ku nool nahay.

Waxaa kaloo jira waxyaalo inaga yaabinaaya oo maalin walbaba ARKEOLOJIYADU soo saaraysc oo lagaba yaabo in ay wax ka beddesho taariikhda adduunka amaba sii sugto wixii hore loogu yiqiinnay. Maxaa yeelay, maantaba jiritaan ilbaxnimo oo heer sare gaaray baa loo qirayaa dadyowga badan oo hore loo oran jirey taariikh macno leh amba ilbaxnimo qoto dheer weligood ma yeelan. Arrimahaasi waxay xiisa gooni ah ka dhex abuuran culimada baarta taariikhda iyo kuwa xaqiijiya (ARCHEOLOGHI).

Haddaba annagoo ku noqonayna mawduuceenna si lagu garto fanka ama lagu dhadhansado, kuma filla in la eego oo keliya ee waxaa loo baahan yahay waxbarasho sal leh iyo garasho gaar ah oo qofka ku dheehan.

Marka aan leeyahay waxbarasho waxaan ugala jeedaa si ugu horraynba loo garto aqoon ahaan qaybaha cilmiyeed ee uu ka soo jeedo nooca fankaasi, tan xigta fasiraadda cilmiyeed ee loo baahan yahay in ay yeeshaan indhaha lagu arkaayo, laguna qaddirinaayo fanka asaga ah.

Run ahaantii fanku tilmaami maayo runta nolosha iyo dabeecaddu sidey yihiin oo qayaxan, marka aan sidaa leeyahay waxaan ulajeedaa in had iyo goor ay ku xiran tahay hadba siduu ruuxa fannaanka ihi u arko, taasoo aan ahayn keliya wixii indhihiisu qabtaan oo laakiinse indhihiisaas ay weheshaan niyadiisa iyo wax ruuxiisa ka imaanaaya amaba ka soo go'aaya, wuxuuse mar walbaba ku xiran yahay heerarka goonida ah ee taariikhdu siday u saameynayaan ruuxa iyo dhaqdhaqaaqa ummadda dhinac kasta: diinta, falsafadda, siyaasadda iyo suugaanta iwm.

Taasi waxay ina tusaalaynaysaa in aanu fanku ahayn ku dayashada runta nolosha iyo dabeecadda oo qayaxan ee uu yahay sida qofku u arkaayo ama wax u dareemaayo. Marka waa in loo qaataa fan muuqaal wax kasta oo la xariiqo ama la masawiro inkastoo marar aanu inala lahayn qaab ama muuq aan garanayno sida kan dahsoon oo kale (Arte Astratta).

Markii aan isu sheegnay wuxuu yahay fanka muuqaalku, wuxuu taro iyo ilaa xadka uu wax taro, asbaabaha dhaliyay iyo kaalintiisa taariikhiga bal marka aanu u soo daadegno dalkeena Hooyo iyo fanaaniintiisa muuqaalka.

Dalkeennu waa ku hodan fannaaniinta muuqaalka kuwaasoo u kala qeybsanaa kuwa alwaaxa iyo geedaha qora, ama xardha, kuwa dhagaxa Ceel-buur qora, kuwa lafaha, geesaha, qumbaha mirihiisa iyo foolasha Maroodiga qora, iyo kuwa gacanta wax ka sawira Asleyaasha.

Marka aan ku soo qaato maqaalkaygani kuwa gacanta wax kasawira, Asleyaasha, dalkeenna aqoonta sawirka way ku cusub tahay oo ma ah in dalalka ku faani kara in ay lahaayeen aslayaal magac ku reebey dunida iyo dalkoodaba. Hase ahaatee fankani Kacaanka ka hor wuu sii qiimi liitey. Waxa jiray aslayaal tiradoodu aad iyo aad u yar tahay oo faraha lagu tirin karo helinna fursad iyo meel ay ku soo shaac bixiyaan fikradaha ka dhex guuxi jiray oo xaqiiqdii ahaa kuwa aad iyo aad u sarreeya ha noqdeen dhan siyaasadeed iyo dhan kaleba.

Taasi waxa marag u ahaa bannaan baxyadii la sameyn jiray Kacaanka ka hor boorarka ama maanifestooyinka ay sameeyn jireen iyo muuqaalladii ay ku soo bandhigi jireen kuwaasoo muujinaayey heerka garaadkooda siyaasadeed iyo aqoontooda farsamoba.

Ma jirin dhaxal kooxdanni haysatay oo way ka nasiib xumeyd kooxaha kale ee fanka muuqaalka ka dib curashadii Kacaankii libineed ee 21ka Oktoobar ayey kooxadani u heshay nasiib inay helsho goob iyo fursad ay ku kordhiyaan heerka aqoontooda iyo fursad ay ku soo bandhigaan fikradahooda taasi oo uu u suurto geliyey xafiiskii siyaasadda ee hore.

Xafiiskaasi oo lahaa Laanta Warfaafinta iyo Borobogaandada waxa la soo gudboonaatay hawl aad iyo aad u culus. Laantu waxay ku tallaabsatay inay ururisc

wixii asle ahaa ee markaas joogay. Tallaabadaasi faa'iidooyin fara badan bay ka dhalisey labada dhinacba, dhanka Xafiiska waxay u sahashay la xiriirinta mujtamaca iyo ka dhaadhicinta go'aannada G.S.K. ku Baraarujinta hawlaha iskaa-wax u qabso abaabulka iyo ku hubeynta aydiyoloojiyada hantiwadaagga cilmiga ku dhisan; intaasoo dhan waxay u gudbisay mujtamaca uu xilka ka saarnaa waxayna ugu gudbisay hab muuqaal ah, inkastoo ayada nafteedu ahayd hawl aan sahlanayn loona baahan yahay tixgelinta arrimo dhowr ah oo mitaal ahaan ay ka mid yihiin: Hiddaha iyo Dhaqanka qiimeyntiisa, ilaalintiisa iyo xaqiijinta dhaqanka gelintiisa; aqoonta mujtamaca la socodkeeda, kordhinteeda, ka ilaalinta arrimaha dhibta u keeni kara; ku tiigsashada niyad waddaniga ah iyo shucuurkeedaba oo ku dhisan hab baraarujin iyo ka ilaalinta heerkeeda ugu sarreeya iyo ku beeridda fikirka caalaminimada iyo arrimo dhowr ah oo aad iyo aad muhiim u ah.

Isla mar ahaantii Laanta ayada ah kuma ekaan shaqadeeda oo keli ah waxayna u gudubtay inay wax ka qabato dhanka aslayaasha ayadoo fulisay qodobbada hoos ku qeexan:

1. Ayadoo kordhisay tirada iyo tayada aslayaasha ee markaas jiray sarane u qaadday wax soo saarkooda.

2. In Aslayaasha ay ku beertay kuna kordhisay jacaylka farsamada sarana u qaadday qiimaha farsamadooda;

3. In ay dadkoo dhan bartay, kuna beertay u bogidda fanka qiimaha leh;

4. In dadka ay ku dhalisay ku baraarugga micnaha fanka, iyo isku taxalujintiisaba, ayadoo ku dadaaleysay inuu sii wanaajiyo sarane u qaado heerka uu taagnaa, kuna dadaashay inuu ahaado mid isku xiraaya hiddaha iyo dhaqanka iyo kacaantinimada ummadda Soomaaliyeed.


5. In fanku noqdo wax dadkoo idil la gaarsiiyo ee aanu noqon mid ku kooban koox kaliya ayaabo dad badan ku soo jiidda goobta fanka siiba dhallinyarada soo kacaysa iyo si loo beero dhadhankooda.

6. Iyadoo fannaanka ka dhaadhicisay waqtiga xaadirka inuu ka mid yahay dadka u halgamaya inay muujiyaan waxyaalaha dhaxal galka u ah dalka iyo dunidaba.

Xilkaas intiisa badan asaga ayaa gutay, waxaase jirtay inay ku caawimeen Hay'ayadaha dawladda guud ahaantood, waxaase ammaan khaas ah mudan Wasaaradaha Hiddaha iyo Tacliinta Sare oo ka caawisay soo saarka koox Aslayaal ah una samaysay bandhig.

Lama iloobi karo labadii bandhig kii la sameeyey Bisha Juun 22-27-1973kii oo ahaa kii ugu horreeyey tan iyo intii uu Kacaanku ka curtay dalkeenna laguna dhex qabtay Guriga keydinta hiddaha iyo dhaqanka iyo kii la qabtay bilihii Oktoobar — Nofembar 1976 Bandhigga Banfas — Bandhigga fanka iyo suugaanta xulkii ka soo baxayna galay Bandhigga Hiddaha iyo dhaqanka ee beelaha madow «FESTAC» kaas oo lagu qabtay Magaalada Leygoos «Nijeeriya» waxyaalahaas oo dhan waxaa looga jeeday in lagu dhiirigeliyo dhallinyarada laguna tusaaleeyo ayadoo dhabbaha loogu sii xaaraayey si fan muuqaaleedka Soomaaliyeed aayatiin dambe u yeesho, Ayadoo Ummad iyo Dawlad ahaan lagu dadaalaayo dadka fanka Muuqaalka jecel iyo kuwa Aslayaashaba ah isku kalsoonaadaan oo u gartaan qiimaha ay leeyihiin, ayagoo la mid ah dhammaanba fanaaniinta. Tirsiga dambe ee Halgan waxaan idinkula socodsiin doonaa maqaalka qaybihiisa dambe oo ka kooban marxaladaha taariikhiga ah iyo xubna cilmiyeedka ay u qeybsanto aslidda.

## Buugaagta iyo Qoraallada



# Khudbaddii Xoghayaha Guud ka jeediyey xafladdii Ardayda ka qalin jebisey Kulliyadda Caafimaadka

Jaallayaasha Xubnaha Golaha Dhexe, Mudanayaasha u madaxa hay'adaha Diblomaasiga, xubnaha sharafta leh ee guddiga farsamada, macallimiinta qiimaha leh, Jaallayaasha qalin-jebiyey iyo ardadeenna suuban.

Mar laga joogo shan sano ayaan qaadannay tallaabo culus oo loogu hawlgalayey sidii dadkeenna loogu heli lahaa qalab hawlwadeenno ugu filan iney caafimaad helaan, cudurradana ka badbaadaan. Waqtigaas doodo iyo muran badan baa arrintaa ka taagnaa, ayna ka qaybqaateen xildhibaannadii Golihii sare ee Kacaanka, kii Xoghayayaasha iyo madax ka socotay Jaamicadaha Dalka Talyaaniga, waxaana la is-warsanayey habboonaanta, suuragalka iyo ballarka baahida loo qabo in lagu dhaqaaqo dhismaha kulliyadda Caafimaadka ee J.D.S. Dhibaatooyinka arrintaas hortaagnaa runtii wey ka badnaayeen kuwa dhiirigelinaya, hase yeeshee mar haddii niyad-sami la qabo, himmad iyo adkeysina jiro dhibaatooyin badan oo bani-aadanka horumarkiisa hakinaya ayaa la gudbi karaa.

Takhaatiirtiinnaan cusubi, Jaallayaal, waxaad tihiin mirihii ka dhashay go'aankaas taariikhiga ah, waxaadna weligiin marag u ahaan doontaan himmaddii wanaagsanayd, haladayggii iyo kalsoonidii ay mustaqbalka Soomaaliya ku qabeen intii arrintaas isku shuqlisay.

Maanta waxaa la is-wareysan karaa: Maxaa ku wacnaa in culays la saaro dhismaha kulliyaddaas? Muxuuse ahaa mustaqbalkaas kalsoonida ballaaran lagu qaqabey?

Sida qof waliba maleyn karo, culayska waxaa loo saaray abuuridda kuliyadaas in laga hortago belooyinka beniaadanka lagu salliday kuwa ugu waaweyn mid ka mid ah: taasoo ah Cudurka.

Kolleyba ummad gumeysi ama gumeysi cusub ku hoos jirta, la qaybshay, jinni qabiil lagu dhex-abuuray, uma suuro-geleyso iney si habsami ah u kobocdo haddii ayan xoog saarin kor u qaadidda wacyiga siyaasiga ee dadweynaha, fayoobidiisa jirka iyo maskaxdana ayan durba ku dhaqaaqin.

Bal qunyar ku fikira: muxuu horumarka bulshada ka tari karaa miskiinka beeraleyda ah oo jirro dilootey, qoyskiisana bar duumo la jiifo, barka kalena kaadi-dhiig? Muxuu ninka reer miyiga ah, oo qaaxo cidla ka haleeshay, wax u miciinayaana ayan jirin, ku kordhin karaa? Waxaabase ka sii daran qofka dumarka ah ee si joogto ah dhibaato halis ihi u soo food saarto, marar badanna uba dhimato, taasoo ku lug leh arrinta si kale caadi u ahaan lahayd ee ummulidda. Intaas oo dhammi qolo ay haysato, oon weliba ka gaabsannay inta cudur iyo shil ku dhaca shaqaale weynaha, Ardada, caruurta iwm, waad malayn karaysaan ineyan suurto gal u ahayn iney u soo jeesato tacab soo saar habaysan oo qorsheysan. Waxay qabataa waa uun iney luqmo goobto ama deeq dhowrto.

Saas awgeed, shaki kuma jiro in si looga adkaado mushkiilladda dib u dhaca in hor iyo abbaataba si taxan oo qorsheysan looga hortago, loona baabi'iyo cudurrada iyo dhaawaca oo aad u naafeeya hindisaha, kartida iyo tacab soosaarka xoogagga shaqeeya, ka dibna bulshada oo dhan.

Asaga oo arrimahaas tixgelinaya ayaa Kacaanku ku adkaystay in la abuuro kuliyadda Daawada taas oo weliba la oran karo waxay ku muuqatay inay tahay bar-tilmaameedka kulliyado kale oo bilaabiddooda shaki badani dadka uga jirey.

Maanta waxaan is-leenahay hawshannadii bar baa dhammaaday, barayaashiinuna waajibaadkoodii intiisii badnaa waa guteen, waxaana bilaabmaya kiinnii, gabdho iyo wiilalba oon filayo inuu aad u farabadan yahay, cuslaanna doono. Kolse haddii hubkiinnii aqooneed iyo qalabkiinnii shaqo la idiin dhammaystiray, waan hubaa inaad ka jiba-keeneysaan. Adinkaa la idinka sugayaa inaad u gurmataan gees walba ee waddanka iyo meeshii walba ee hawshiinna looga baahdo, si aad waxa cuddur la yiraahdo u daaweysaan, ugana hortagtaan, dadkana u bartaan sida ay isaga daaweyn lahaayeen ama uga badbaadi lahaayeen. Sidoo kale idinka ayuu sugayaa bilowga hab naxariiseed iyo caado fiican ee bukaanka lagu baanto; si loo hirgeliyo cilmi baaris iyo horumarin dhismaha iyo qaabka hadda kulliyaddu ku sugan tahay.

Khudbaddii aan idiin soo jeediyey bishii Noofembar 1975tii, markii aan la hadlaayey dhallintii

ka qalin jabisay kulliyadda Beeraha, Kiimikada iyo Culuunta Bulshada ayaan ku soo koobay sida aan u arkeynno hadafka tacliinteenna, habka Kacaanka iyo Hantiwadaagga ah ee lagu qotomiyo iyo waxtarka aan ka filaynno hawl wadeenno inoo soo baxaya. In taan idinku soo celin lahaa, waxaa fiicanaan lahayd inaad inta soo qaadataan koox koox iyo qof qofba u daristaan, maxaa wacay adinka iyo Jaallayaashiinna kulliyadaha kale ayey u jeeddey, maadaama mustaqbalka Soomaaliyeed oo dhami idinku xiran yahay.

Kacaanka 21kii Oktoobar wuxuu Soomaaliya ugu baaqay waajibaad culus, anse hubo iney ka bixi karto. Wuxuu ahaa baraarujin cusub, wuxuu ahaa dadku wuxuu qabey ama tabanaayey ka yimid, wuxuu ahaa ku boorin dadweynaha inuu aayihiisa dambe ka taliyo, asagoo isku dhaqaya caddaalad, dimoqaraadinnimo iyo horukaca loo dhan yahay, intaas oo keligood keeni kara inuu damo iska-horimaadka bulshada dhex yaalla.

Annagu waxaan isku daynay inaan iska-horimaadkaas xasilinno, inaan dadweynaha ra'yi isku biirsanno, si loogu waddo-xaaro bulsho sinnaantaas ku nool, inaan waddada saxa ah tusaaleyno, waqtigaas gaaban awgiis, nooma suurogaleyn inaan muhimmadaas wada taabbogelinno.

Runtii waddan iyo amuurihiisu ma dhammaadaan, annaguna dhibaatooyinka ina haya ma ebyeynno. Waxaa aad muhiimka u ah inaad adinku si fiican u fahmtaan kacaanka, kana-dab-qaadataan, himilooyinkiisana fulsiaan.

Soomaaliya, sida runta, ah, dhibaatooyinka hayaa ma yara, kuwo badana waa ku soo socdaan. Haddaan isdhaho wax ka taabo, shacbigaas xooggiisii isugu geeyey siduu dib-u-dhaca dhaqaale iyo kan bulsho uga gudbo, maanta madaxbannaanidiisii baa halis ku jirta Dembigiisuna waxa weeye maxaad shacbi walaalkaa ah oo si kharaar ugu dagaallamaya xorriyadiisa gacan u siisay.

Mana aha Taliska Itoobiya mid maanta khatar gelin kara Soomaaliya, sida uusan u waabin karin dagaallada Jabhaduhu waddammadoodii intii badnayd ay ku xoreeyeen. Maya, arrintu halkaa ka qurmi mayso! Ee waxaa weeye xoogag shisheeye oo isku bahaystay inay danahooda istaraatejiga ah iyo khushigooda ku maamulaan xaaladda Geeska Afrika.

Wareerka iyo dagaallada maanta ka socda Geeska Afrika waxay xoogagggaasi ka dhigteen gabbaad, si ay uga faa'iideystaan qaska dhabta ah ee ka taagan Imbeerada gumeysiga ah ee Itoobiya.

Qaskaasi ma aha mid kedis ku dhacay oo nin kastaa iska soo faragelin karo. Waxay jirtaa dadka isu-aqoonsan inay Xabashi yihiin, xoogagga ka soo horjeeda Taliska Addis-Ababa ee gudaha iyo jabhadaha Gobannimodoonka iney arrintaas muquuniyaan, xal wax biskeyn karana u helaan.

Xataa arrintu hadday intaa ka sii xumaato oo carro badan saameeyso, waxay jirtaa Dawladaha Afrikaanka iyo ururkooda inay helaan waddadii ugu habboonayd oy uga hortegi lahaayeen, ee marna faragelin shisheeye faa'iido ma keenayso. Bal, waxaaban shaki lahayn iney ka sii dareyso, oo sii xoojineyso macangagnimada Xabashida. Maantaba waxaynu arkaynnaa in Taliska Addis-Ababa, isagoo garab ka haysta xoogag shisheeye, inuu doonayo inuu wax walba cudud ku muquuniyo; wada-hadal ma hadal hayo, nabad ma hadal hayo caqli celisna kuma jiro. Kolka xoogaggii ka soo horjeedey iyo jabhadihii waxa u haray waa uun iney jiritaankooda iyo mabaadii'dooda daafacaan. Taasina waxay khatar gelinysaa nabadda gobolka oo dhan: Laga bilaabo khalijka ilaa Bariga Dhexe, iyo hadda adduunka oo dhanba. Khatartaas ku ballaaraneysa Gobolka durba calaamadaheedii waa muuqdeen, dagaallada socdana waxaa suuragala iney in badan dheeraadaan.

Dad badan baa, marka waxay is-warsan karaan, haddii ay xaaladdu saas tahay, muxuu yahay mowqifka Soomaaliya? Runtii mowqifka Soomaaliya waa cad yahay, ga-gabbashana ma leh. Annagu weliganno nabad baan ku talin jirney, siddeedii sano ee dambana waxaan dadkannaga oo dhan gelinney sidii nabad dhan, oo ansaxda oo xaq ah lagu gaari lahaa. Fagaaro kasta ayadaan la taagneyn, madaxda Adduunka oo aan is lahayn wax bay ka qaban kartaana saasaan ku wargelinney.

Maanta qudheeda annagu nabad baan ka hadlaynnaa, wax wada-qabsi baan ka hadlaynnaa, annagoo u barannay inaan dhego dhukan iyo is-afgaran-waa mar walba la kulanno. Nabaddase niyad keli ah laguma helo, xoog laguma keeno. Nabad si loo heelaa waxay u baahan tahay shaqo culus, maskax furan, qaddirin dheer dadka xorriyadooda, aadaminimadooda iyo rabiddooda. Maanta nabaddu waxay martaa waddada gobannimodoonka iyo ummadaha u dagaallamaya si ay aayahooda dambe uga taliyaan. Waxa la'aantooda nabad soo hayn karaan ma jiraan, ninkii is-yiraahda waxtar ma ahee korkooda lagu heshiiyana, waa mid wixii kale oo uu u dan leeyahayba, aan nabad u jeedin. Dadweynahaas kacay, oo dhiiggoodu maalin walba daadanayo, oo aan naf iyo xoolo midna ku bakhaylin, oo gumeysi wareersan iska hinjiyay, ninna xaqiisa ma duudsiyi karo. Runtu waa taas, waana ayada in lagu xisaabtamo, maxaa wacay haddii la iska dhegatiro nabad afka lagu macaaneysanayo iyo welwelka nabadda dawladaha ay daneyso ay qabaan, waxay ku soo koobmayaan iska hadal. Waan ku celinayaa: Inkasta oo nala daandaansanayo, inkasta oo magaalooyinkayagii la garaacay, inkasta oo been fara badan nalaga sheego, waxaan ku baaqaynnaa, baan eegey-

nnaa, mustaqbalkiina Jaallayaal, iyo kan malyan kale ee dhallinyaro ah oo loo baahan yahay inay gobolkaan uga dhisan sal adag walaalnnimo, is-afgarad iyo horumar.

Waxaanaan hubnaa inaan arrintaas taageero buuxda uga heleynno shucuub bdan oo saaxiib nala ah, iyo niman ay dadnimo iyo il-baxnimo ay waddo aan aqoontooda iyo waayo-aragnimadooda nagala bakhayleyn, sidii hadda ka horba dhacday.

Halkaas haddaan joogo, maadaama intii wax na tartay aanan magacyadooda soo koobi karin, waxaan tusaalayn u soo qaadanaynnaa madax iyo macallimiin badan oo jaamicaddaha kala duwan ee daldalka Talyaaniga, maantana qaarkood munaasabaddan wayn inala ciidahayaan.

Waxaanse is leeyahay arrintaas dhibaato weyn baan kala kulmi lahayn, haddii Dawladda iyo dadka Talyaanigu ayan garab nagu siin. Dadaalkii hay'dihii ku shuqul lahaa iyo raggii ku soo jeedayba, maantoo qalin jibeyseen, waxay naga mudan yihiin qaddarin weyn iyo mahad ballaaran.

Wasiirka Sharafta leh ee Bassi iyo Safiirka Talyaanigana waxaan ka codsanayaa inay mahaddaas naga guddoomaan, una gudbiyaan Shacbiga Talyaangia.

Waxaan kale oo mahad iyo ammaan balaaran u soo jeedinayaa Madaxda, Macallimiinta iyo Hawlwadeenka Soomaaliyeed oo si xilkas iyo waddaninimo ah u gutay waajibkii qaraneed ee ka saarnaa jaamicadda.-

Ugu dambeystii, Jaalle Taakhaatiir, hambalyo ka sakow, waxaan idiin rajeynayaa inaad hawsha culus oo idinkusoo socota si fiican u gudataan mahadna waxaan u celinayaa intii soo maamushay, wasaarad iyo jaamicadba, ciiddaan weyn, ajnabiga sharfta leh ee nagala soo qaybgashay iyo dadweynaha.



# Bibliyograafiyada Soomaaliya

Cabdi Yuusuf Ducaale

SOMALIA: a bibliographical Surevey 1977 468 p. (Compiled by Mohamed Khalif Salad) special bibliographical series.

New Ser. No. 4 price US$ 22.50 Available from publisher: African Bibliographic Centre P.O. Box 130 95 Washinton D. G. 20009 U.S.A.

«Qorayaasha wax ka qora Soomaaliya ma tixgeliaan sohdimhaha sida aanay u texgelin dadka Soomaaliyeed». Sidaa waxa ku qoray Mr. N.M. Viney, gogoldhiggii uu u sameeyay Buuggiisii «Bibliography of British Soomaaliland». Mr. Viney wuxuu ka mid ahaa maamulkii gumeystaha ee dalka isticmaarsan jiray .Salad oo isagu ururiyay Bibliografiyada cusub ee hadda la daabacay wuxuu qabaa fikrad la mid ah tan hore; isagoo oo ay waaliba u dheer tahay Soomaalinnimo run ah iyo waayo-aragga uu u leeyahay xanuunkii iyo dhibaatadii ka dhalatay kala qaybqaybintii iyo xisadihii isticmaarku kula kacay dalkiisa, iyo aayo xumadii laga dhaxlay shirweynihii Baarliin ee reer yurub laguna guddoonshay kala gogoynta Afrika, 1884tii.

Sidaa awgeed waa dabiici in buuggan laga helo waxa alla wixii laga qoray ummadda Soomaaliyeed dhammaanteed; isagoo ku muujinaaya ururinta buugagga iyo qoraallada kale ee ay dhigeen intooda badan isla kuwii sabab u ahaa kala firdhinta ummaddeenna iyo midnimada Soomaaliyeed ee dabiiciga ah.

Waxay ka qaadatay toban sano oo dhan inu isu geegeeyo shaqadaa wax ku oolka ah. Waxa khasab ku noqotay inuu tago meelo ay ka mid yihiin Waashington, London, Baariis iyo Rooma — Taas oo mahaddeeda ay leedahay UNESCO oo u fidisay kaalmo u suurto gelisay inuu guto shaqada cusub ee la xidhiidha baadhista maktabadaha waaweyn ee dunida ee ay ka mid yihiin kan Kongreeska Maraykanka, Miyuusiyamka Ingiriiska, Maktabadda Xafiiska Isticmaarka, School of Oriental and African Studies, Maktabadda Jaamicadda London iyo waliba Biblioteca Nazionale Centerale Vittorio Emanuele II, Rome, instituto Agronomico per l'oltremare, Florence, instituto Italiano per l'Africa, Rome iyo ugu danbayn Bilbliotheque National, Paris.

Waxa intaa u dheeraa isagoo la tashaday maktabadaha dalka gudihiisa oo dhan. Natiijadii ka soo baxday hawshaas waxay noqotay Buuggan Bibliyoografiyada ee Soomaaliya. Buuggaa oo ah kii ugu weynaa ee noocan ah lana daabacay waxa kale oo loo baahnaa in socdaallo lagu tago Ruushka iyo Jarmalka oo ururiyuhu uu caddeeyey in laga helaayo tirooyin badan oo ahmiyad taarrikheed leh — khariidado, iyo amuuro badan oo ku lug leh Antroboolajiga iyo sahaminta Soomaaliya». Maktabado ku yaal Turki iyo India ayaa iyagana loo baahnaa in loo tago sababahaas oo kale. Turki waxaynu xidhiidh la lahayn ilaa Qarnigii 15aad, dhulkii Soomaaliyeed ee Ingiriisku haysan jirayna waxa laga xukumi jiray Indiya ilaa 1923kii dhowaa.

Haseyeeshee ururiyaha canaan wuu ka barraxan yahay, hawsha uu ku keliyaystay awgeed, deeq yar oo uu ka helay UNESCO mooyaane; balse waxa waajib ah in loo riyaaqo guushan weyn ee u soo hooyay.

Afafka lagu koobay buuggu waa Ingriisi, Talyaani, Fransiis, Jarmal iyo Soomaali. Carabigu kuma jiro sida ururiyaha naftiisu uu ku caddaynaayo hordhaca buugga, isagoo arrintaa ku tilmaamaaya «jileec oo dulqaadan karo». sababta aysan carabigu ugu jirin wuxuu mar kale kaga hadlaya hordhaca, waxaanu yidhi «magacda Carabiga ee ka hadlaaya Soomaaliya way yaryihiin marka loo eego Aafafka kale mana jirto maktabad qudha oo si nidaamsan loogu xafiday.» Halka waxaan anigu ka qabaa dood, socdaal lagu tago Dar-Alkutub oo ku taal Qaahira ayaaana fikradda kor lagu soo sheegay dhinac u riixi karta.

Inkasta oo Buuggu aanu wax ka taataabanayn Qoraaladii hore iyo kuwii waqtigii dhexee, Soomaalidu xidhiidhkii ay la lahayd Masar wuxuu dib u noqdaa ilaa maalmihii Xashabsuut. Carabta muarikhiintooda, juqraafiyahannada iyo sahamiyaashoodu waxay waayo hore wax badan ka qoreen Afrika dhinaceedan, waxaana kuwaa ka mid ahaa Al-masuudi (935) Al-Istikhaari (960) Ibni — Hawqal (977) Al-Bairuri (1030) Al-Bakri (1067) Al-Idriisi (1154) Yaaquut Al-Hamaawi (1229) Ibn Saciid (1344) iyo Ibn Batuuta (1331). Abwaanada Carabeed ee hadda wax qoraa wax badan ayay iyaguna ka qoreen dhulkan. Waxan rajaynayaa in ay maalin maalmaha ka mid ah uu Salaad ama qof kale ay u suurtowdo in uu buuxiyo baahidan. Buuggu wuxuu u qaybsan yahay 17 xubnood (Chapter) iyo laba Addendum (A&B). Waxa jira xubno ka kooban ilaa 14 qaybood sida xubinta koowaad ee ku saabsan Beeraha. Si fikrad looga helo dhammida shaqadan, xubinta XII siyaasadda,Dawladda iyo maamulka waxay ka badan yihiin 3000 oo magac oo ka kooban Buugag, warqado iyo wargaysyo.

In ku dhow «4000 oo Buug iyo qoraallo kale ee ku saabsan suugaanta laga qoray Beeraha, juqraafiga, antrooboolojì siyaasadda iyo maamulka» ayaa lagu daray buugan.

Waqtiyada buugga lagaga hadlay waxay ka «bilaabmaan waqtigii sahamiskii — soo gaadha waqtigii isticmaarkii oo ay ka dambayso waqtiyadii isticmaarka ka danbeeyay ama casrigii xornimada.» Taariikhda ugu danbaysa magacda buugga ku jira waxa la qoray 1975.


Soomaailya oo hadda si xiiso leh ugu jirta wararka dunida marka laga soo qabto juulay 1977kii intii uu huray dagaalka gobanimodoonka Soomaali Galbeed iyo Abbo ay ku qaadeen Gumeysatada Boqortooyada Xabashida, ururiyuhu wuxuu kaalmo aan la xisaabi karin u gaysan karaa dadyowga baahida weyn u qaba taarikhda gogoldhilgga u ah waraka Geeska Afirka.

Salaad waa nin naftiisa isagu soo dhisay oo wax isasoo baray. Wuxuu tabarbar makhtabadaha ah ku soo qaatay wadammada Ingiriiska, Nayjeeriya iyo Maraykanka. wuxu maktabad haye ka noqday maktabadda Jaamicadda Ummadda 1965kii ilaa 1969kii Dabadeed Wuxu maktabad haye ka noqday ktabadda Bangiga dhexe ee Socmaailya, halkaas oo uu ka rukhsaystay 4 bilood ka hor. Salaadimmika waa qoraa madax bannaan wuxuu isku taxalujiyaa hal abuurka. Shaqadiisii u horraysay ee Gabayada oo ku qoran Afka Ingriisiga «The Patheon of Punt» waxa lagu daabacayaa kulliyada Lafoole ee waxbarashada bilowga 1978.

Maktabad hayaheennii isu rogay gabayaagu wuxuu leeyahay dhawr sheeko oo gaagaaban oo aan weli la daabicin. Gabayadiisa qaar ka mid ah waxa hore loogu daabacay wargaysyo suugaaneed oo debedda ka soo baxa.

Inkasta oo shakhsiyaad iyo hay'ado badan ay intuba isku hawleen shaqadan oo kale, shaki kuma jiro in salaad tiisu ugu wanaagsan tahay.

Hay'adahaasi waa inay ku soo dhaweeyaan buuggan gacmo furan mahadna u jeediyaan ururiyaha, buuggana meesha uu ka mudan yahay ka dhigaan maktabadaheenna. buuggaan waxa loo isticmaali karaa baadhis kasta oo lagu suubinaayo dhinaca bibiliyoograafiyada Soomaailya.Salaad waajibka ka saaran ururinta biblyoograafiyada waxa la rajaynayaa in aanay halkaa ku dhammaan. waa inay ahaataa bilowgii—waxaanu rajaynaynaa in Abwaanimadu (annagoo jecel) inaysan naga dafin hawlkarnimada iyo sabir badanaanta ururiyaha.



Midnimada Afrikaa burburin midabtakoorka



Xamar: Magaalo da'weyn oo taariikheed